MAJALADDA
MARAG
Cadadka Todobaad | Oct 2025

# ISBEDDELKA XALINTA KHILAAFAADKA IYO KORORKA DILALKA PUNTLAND:

## Xaalad u Baahan Farsamo Cusub

Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)

Bogga: 31



Xigashada Sawirka: AI

MAJALADDA MARAG

# Qorayaasha Majaladda




**Maxamuud Cali Aadan Hoorri**
BARBAARINTA & GARDAADINTA HAL-DOORKABULSHADA SOOMAALIYEED 4





**Dr. Mohamoud A. Mohamoud**
WAXBARASHADA IYO TIKNOOLAJIYADA: Saamaynta "Garaadka Artifishalka Ah" (Artifical intelligence)" 11





**Asmaa Sh. Cabdulqaadir**
Yaraanta Macallimiinta Dumarka ee Soomaaliya iyo Saamaynta ay ku Leedahay Waxbarashada Gabdhaha 19





**Axmed Siciid Nuur**
27 Sano Kadib: Puntland ma u baahan tahay dib-u-habayn siyaasadeed, 22






**Aadan Badiic**
DHIBTU WAA DHANKEE Danayn La'aanta Bulshada Mise Damaca Siyaasiga? 28





**Saki Rabiica**
Isbeddelka Xalinta Khilaafaadka iyo Kororka Dilalka Puntland: 31


**Cabdiraxmaan Baashe**
Macallinku Waa Laf-Dhabarta Horumarka: Ma Helay Xuquuqdii uu Mudnaa? 34





**Dr. Maxamed Cali Faarax**
Puntland iyo Xisbiyada Siyaasadda: Dimuqraadiyad aan daacad loo ahayn 39





**Cabdiraxmaan Shiikhdoon**
SALAQLAYNTA SIYAASADDA SOOMAALIYA: " Saldhigasho La'aan iyo Samata-bixin La'aan" 43

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno daabacaadda todobaad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed aan ugu talaggalnay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Majalladda Marag, oo la qorsheeyay in la daabaco hal mar bishii, waxaa aasaasay xarumaha ku midaysan Iskaashiga Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Newsrooms Coalition – SNC). Iskaashigan wuxuu ka kooban yahay xarumo kala duwan, kuwaas oo kala ah: Milgo Media, Puntland Mirror, The Daily Somalia, Dookh Press, iyo Gaashaan Dialogue.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Cadadkan waxa uu ka koobanyahay mowduucyo kala duwan oo diiradda saaraya siyaasadda, tiknoolajiyada iyo arrimaha bulshada kuwaas oo ay qoreen khubaro aqoon iyo waayo-aragnimo ballaaran u leh qaybahan.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# BARBAARINTA & GARDAADINTA HAL-DOORKABULSHADA SOOMAALIYEED



Maxamuud Cali Aadan Hoorri



Xigashada Sawirka: Wasaaradda Waxbarashada Puntland

“Dowlad xoog leh, ku dhisan falsafad adag iyo siyaasad cad, garanaysa waxa ay xaqiijinayso ayaa hal-doorka & labeenteeda qaabayn karta, haddiise werweynteeda laga helo goof bannaan (baylah) oo aan dowladi ka jirin shaki kuma jiro in ay cid kale jarabaranayso si ay u fuliyaan qorshaheeda iyo hadafkeeda— taasina waa guri ba’ay, gelengel iyo reera muskood, waana waxa maanta inna ka dhigay bulsho dhakhtar wada jiifta.

## HORDHAC

Barbaarinta & gardaadinta hal-doorka iyo maanka bulshada: maxaa loo abuuraa ama loo diyaarshaa? Sidee se loo barbaariyaa ama loo sameeyaa? Yey se dani ugu jirtaa oo ay u adeegaan? Weydiintan, haddii aan ka keenno ama aan su’aal iska warsanno ku aaddan nuxurka iyo fahanka ay xanbaarsan tahay horta labeenta bulshada ma la sameeyaa? Haddii jawaabtu noqoto “haa”, waa maxay sababta loo sameeyaa? Qaabkee se loo sameeyaa dadka loo dooranayo in ay noqdaan hol-doorka qaybaha kala duwan ee bulshada?

Dood kasta, waxa ay leedahay curiye soo ifbixiya iyo laliye baahiya—gaarsiiyana dadweynaha kala duwan iyo daafaha adduunka. Jawaab-celin kastana, waxa ay u baahantahay in lagu dhiso xaqiiqo sugan iyo difaacasho lagu xoojinayo meelmarkeeda aqooneed iyo midda sharciyeedba, iyadoo laga fogaanayo wax kasta oo keeni kara xagaldaacin iyo falloocinba.

## MILICSI

Soomaaliya, waa dal ka soo kabanaya dhacdooyin waaweyn. Soomaaliya, waxa ka dhacay qaran-jab iyo burbur baaxaddiisa leh. Soomaaliya, waxa muddo ka aloosan colaado aan weli la garanayn cidda falkinaysa. Soomaaliya, waxa ka jira aragtiyo iyo fiirooyin loo soo waaridey iyo duullaan guud oo natiijadiisa dhibbane loo yahay. Soomaaliya, waxa ay martigelisey aragtiyo gurracan iyo colaado isku dhafan.

Haddii aan ka soo qaadanno qodobbada ugu doorroon iyo tiirarka ugu mudan ee shacabka Soomaaliyeed la tiicayo (liicliicayo) welina aanu si sax ah uga soo kabsan waxa ka mid ah;

a. Colaad Sokeeye Oo Raagtey: Hilaaddii 1991-dii Soomaaliya waxa ka dhacay burubur iyo qaran-jab weyn. Shacabka Soomaaliyeed, waxa uu cagta saaray dhabbaha halaagga iyo wadiiqada jaah-wareerka. Carriga ama geyiga Soomaaliya waxaa ka dhacay qax iyo qarracan, dhac guud, dagaallo fool xun iyo xasuuq bulsho, dil, kufsi, boob iyo ku habsasho dhul dowladeed, qabsasho hanti dadweyne, bililiqo xarkaha goosatay, colaad baahdey oo guri kasta gaartey. Shaki kuma jiro in arrinkaasi yahay mid laga dheehan karo meertada nolosha iyo shacabweynaha Soomaaliyeed.

1. Loollan & Khilaaf Siyaasadeed: Marka laga hadlayo khilaafka iyo loollanka ka dhex jira giraanta (shukaanta) siyaasadda iyo hoggaanka bulshada hor taagan— waxa hubaal ah inuu u dhexeeyo is-maandhaafkaasi siyaasi ku mamay burburka, hoggaamiye-dhaqameed ku milmay foolxumada burburka, danayste ku bullaalay maqnaanshaha dowladda, qab-qable ku tabaraystay dilka iyo dhaca dadweynaha, hal-door iyo hormuud ku barbaaray aragti shisheeye iyo falsafad ka maran qarannimo.

2. Jidba-kooxeed & Dagaallo Argaggixiso: Burburkii iyo qaran-jabkii Soomaaliya ka dib, dalka waxa soo galay aragti ku dhisan kooxaysi diimeed, takoorid caqiido, gaalaysiin ku dhisan mad-hab gaar ah, jihaadiyiin aan la aqoon haybtooda. Sidoo kale, dalka waxa ka dhacay dagaallo dhex maray bulshada iyo kooxo isu caleema saaray hoggaanka diinta iyo jihaynta bulshada. Waxa ka dhashay cawaaqib-xumo iyo xasillooni-darro aan weli laga soo kaban.

3. Caamo Culimowdey & Caqiido Leexsan: Dagaalka ka dhasha diinta iyo caqiidada waxa uu noqdaa mid lagu gubto in badan. Waxa laga dhaxlaa jaah-wareer iyo xasarado waaweyn. Soomaaliya, markii ay burburtay ama dowladdeedii ay dhacay, waxa ka kacaamay dhalllinyaro iyo ducaad aan aqoon buuran u lahayn diinta Islaamka. Fadwo ku dhisan qiiro iyo jidbo ayaa hareeraysay dhammaan gobollada dalka. Caamo fara badan ayaa la wareegtey hoggaankii diinta.Wadaad-xume waranku gacanta ugu jiro ayaa minbarkii diinta Islaamka ku habsadey. Waxa ay tashwiish iyo buuq ku fureen bulshadii Soomaaliyeed ee la daaladhacaysay kasabka nolosha, waxa ay kala dileen wiil iyo aabbihiis, waxa ay kala geeyeen nin iyo xaaskii, waxa ay kala qaareen wadaad iyo ducadiis, waxa ay soo waarideed caqiido leexsan iyo colaad isku qoofalan, waxa ay tuureen mad-habkii dalka ka jirey, waxa ay faafiyeen aragtiyo sumaysan iyo hurgumo aan la xakamayn karin.

4. Fashil & Laciifnimo Hoggaamineed: Shacabka

Soomaaliyeed waxa uu dhibbane u yahay fashil hoggaamineed iyo hor-seed gabay kaalintiisii. Soomaaliya, waa dal baahi weyn u qaba in loo helo hoggaan togan, hoggaan shirraban, hoggaan leh aragti qaran, hoggaan leh damqasho iyo dareen bulsho, xanbaarsan waddaniyad iyo difaacid ummadnimo. Fashilka hoggaanku waa halaagga jiritaanka ummadnimada iyo qarannimada. Haddii, foolaadka bulshadu lumiyo kalsoonida shacabka, dayaco ilaalinta sharafta, lunsado hantida ummada, liiciyo tiirarka wax lagu dhiso ama lagu hoggaamiyo waxa hubaal ah in lagu riiqanayo jidka loo marayo dowladnimada iyo xayn-daabkeedaba.

5. Dhaqan-guur Bulsho: Ummad kasta waxa ay leedahay summad iyo dhaqan lagu garto. Ummad kastana, waxa ay leedahay hidde iyo dhaxal-dhaqameed lagaga sooco qayrkeed. Soomaaliya, markii burburku dhacay, lagana qaxay caasimaddii dalka iyo dhammaan maagaalooyinkii waaweynaa waxa si bareer ah loo daadiyey dhaxalkii ummadda Soomaaliyeed, waxa baylah noqday wax kasta oo astaan iyo jiritaan sooyaal u ahaa shacabka Soomaaliyeed. Muddadii lagu jirey dowlad la'aanta waxa dhacay dhaqan-guur bulsho, dhalan-rog dhaqan, dhimaal af, bililiqo suugaaneed, been-abuur taariikheed, tahriibin agab-dhaqameed, xaraashid agab farsamo iyo sanceedba.

6. Hoos-u-dhac Dhaqaale: Dhaqaaluhu waxa uu ka mid yahay dhardhaarrada iyo kaabayaasha lagu ilaasho qarannimada iyo danaha ummadi leedahay. Dhaqaalaha oo burbura waxa ka dhasha baahi dadweyne oo xarkaha goosata. Sidoo kale, waxa ka dhasha foolxumo bulsho, karaama-darro iyo dawarsi aan loo meeldayin. Soomaaliya, markii ay burburtay waxa la burburay dhammaan kaabayaashii dhaqaalaha, waxa lumay jaangoyntii dhaqaalaha, waxaa faraha ka baxay kor-joogtayntii suuqa dadweynaha, waxa baylah noqday furdadihii iyo marsooyinkii dalka, garoomadii iyo gegooyinkii dalka, xeebihii dalka oo idil. Waa hagaage, waxa laga faa'iidaystey baahidii guud, macaluushii ka dhacday dalka, gaajadii garbaduubtay garaadka iyo garashada qofka, saboolnimadii jirdagoysey cirdiga ruuxa Soomaaliga ah. Hoos-u-dhaca dhaqaaluhu, waxa uu wiiqaa danaha iyo maslaxadda dowladnimda, ilaalinta danaha qarannimo, xurmadda, seeraha iyo xuduudaha dalka. Sidoo kale, waxa uu sababi karaa ama uu saamayn weyn ku leeyahay jihaynta qofka iyo qaabayntiisa nololeed.

7. Burbur Waxbarasho: Waxbarashadu waxa ay qaabaysaa qofka u soo baxaya bulshada iyo dalkiisa. Waxa ay sahmisaa garaadka qofka iyo baaxadda uu ku dabaalan karo, waxa ay laylisaa kasmada qofka iyo garaadkiisa, waxa ay toshaa, tuntaa, toosisaa qofka la rabo inuu soo baxo. Burburkii Soomaaliya ka dhacay ka dib, dalka waxa soo galay, manaahij dool ah iyo aragtiyo kala duwan— waxa dalka laga furay iskuullo aan la aqoon haybtooda, ujeedkooda, siyaasaddooda iyo qofka ay soo saarayaan. Keliya, waxa maanta laysla qirsan yahay in dhammaan dhibbane loo yahay wixii dalka soo galay. Dalka waxa laga furay jaamacado kala duwan, cidi ma taqaan waxa lagu dhiganayo, lama saadaalin karin qofka ay soo saarayeen, lama qiyaasi karin ardayga ay barbaarinayeen, lama hilaadin karin waxa maraxu noqon doono. Keliya, waxa dhibbane maanta loo yahay natiijadii ka dhalatay! Manaahij kala duwan oo xanbaarsan aargtiyo gurracan, xagjirnimo, gaalaysiin, caqiido leexsan, fiqi qalloocan, dacwo ku dhisan colaad iyo gacan-ka-hadal. Shacabka Soomaaliyeed, meel uu joogaba waa mid ku jaahwareeray hirarkii burburka iyo taya-xumadii waxbarasho ee ka dhalatay firaaqii qarannimada. Kaaddirka iyo hoggaanka lagu ababiyey aragtidii iyo felsafaddi doolka ahayd ayaa ah maanta caqabadda ugu weyn ee fahmila' meesha loo socdo iyo waxa la hiigsanayo. “Mar kasta oo dowladnimadu xoogsato, kobocdo, yeelato tayo haggoomineed iyo fulin awoodeed waa mar kasta oo kaadirka waxbarashadu tooso, muujiyona tisqaad iyo taabbagal la taaban karo”.

8. Caddaaladdarro & Tabaryari Garsoor: Burburka waxa laga dhaxlaa caddaaladda oo weecata, garsoorka oo wiiqma, fulinta oo fashilanta, tayada iyo aqoonta qaalliga oo yaraata, xulashada shaqaalaysiinta guud oo noqota mid ku dhisan eex iyo qabyaalad, ninjeclaysi iyo garabsiin. Burburkii ka dib, waxa soo ifbaxay kooxo ka macaasha hantida qaranka, booba dadka tabarta yar, ku fooggan musuq-maasuqa iyo jaangoynta sicirka suuqa. Dal burburay; dadkiisuna waa la burburaan. Qaran-jabkii Soomaaliya, waxa ka dhashay oo welina taagan tabasho dadweyne, tacaddi baahsan, tagrifal awoodeed. Caddaaladda oo toosta ayaa lagu gaari karaa bulsho bedqabta. Caddaaladda oo la hirgeliyo ayaa lagu gaari karaa hoggaan hagaagsan. Garsoorka iyo xeer-ilaalinta oo si qumman u guta howlaha loo igmaday ayaa lagu xaqiijin karaa israac bulsho, anbaqaad ummadeed iyo ifafaale qarannimo.

9. Maleeshiyaad Askaroobey: Marka aan ka hadleynno diyaarinta hal-doorka iyo labeenta bulshada waxa ka mid ah, in la helo ciidan carbisan, oo leh cudud xooggan iyo caqiido sugan. Soomaaliya, waxa markiiba lagu yaacay, cagtana la mariyey salabkii iyo saanaddii cududdii uu lahaa xooggii dalka Soomaaliyeed iyo dhammaan qaybihii kale ee ciidanka qalabka sida, waxa soo baxay maleeshiyo iyo qowlaysato garabka qori ku sidata, waxa ay ku barbaareen burbur iyo dawlad la'aan, waxa ay kansho iyo fursad u heleen in dalka iyo dadkaba muquuniyaan. Waa hagaage, waxa loo yaqaanney qab-qablayaal iyo dagaal-oogayaal. Dhammaan qabqablayaashii iyo hoggaamiya-kooxeedyadii dalka soo maray waxa ay ku milmeen ciidanka qaranka kadib, markii dib loo yabyabay Xoogga Dalka iyo Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed. Wiil ku barbaaray, ku indha-qaaday, ku koray, kuna dhaqday, ku hanaqaaday, ku tabaraystay ama ku taagsaday mowjadihii iyo hirarkii ku suntanaa falsafadda qabyaaladda iyo is-muquuninta kaabba-qabiillada waa hubaal inuusan noqonayn sarkaal qaran oo buuxa, cudud fayoow oo lagu ciirsado, gaarhaye carbbisan oo la harsado, muwaaddin wanaagsan iyo astaan qaran oo lagu seexan karo. Haddaba, jaalle "xulasahda askariga ayaa ka dhigan midda ugu habboon ee laga rabo in dowladi ku tallaabsato". Sidoo kale, "laylinta sarkaalka oo hagaagta ayaa waxa ka dhasha hoggaan waxtar leh iyo talis gudasho leh".

10. Talis Debecsan & Kaadir Habowsan: Qof kasta oo ogaal iyo aqoon u leh culuumta lagu derso ciidanka iyo fanka dagaalka, waxa dhab ah oo hubaal ah, inuu garan karo qiimaha ay leedahay in la helo talis awood leh, ku hubaysan xirfad, ku guura sahan, ku maareeya qorshe, ku dhisan xeerar iyo qawaaniin, ku fooggan danaha qarankiisa, u carbisan diyaarinta iyo geeddi-socodka dhismaha hoggaanka guud ee ciidan yeelan karo. Soomaaliya, waxa ay ka mid ahayd burburka ka hor dowladaha ugu awoodda badan dhanka millateriga iyo saanadda cudud-ciidaneed, waxa ay safka hore kaga jirtey dowladaha mudnaanta iyo milgaha ku dhex leh qaaradda Geeska Afrika.

Sidoo kale,waxa iyana dhab ah, ruux kastana fahmi karaa, maraxa iyo miraha ka dhasha debecsanaanta taliska iyo is-weydaarka tababarka ciidanka qaran loo dhisayo. Soomaaliya waxa ka burburay dal iyo dad, aqoon iyo xirfad, garab iyo gaashaan. Haddii aan tusaale u soo qaadanno arrinkan waxa ka mid ah; dhamman waxa burburay kulliyadihii lagu diyaarin jirey saraakiisha S\kiil xigeennada Xoogga Dalka, iyada oo ay beddeshey in dalka dibaddiisa lagu soo tababaro dablayaasha iyo saraakiisha qaranka. Tababarka ciidanka oo la mideeyo ayaa ah astaamaha ugu waaaweyn ee lagu dhisi karo ciidan xooggan oo caqiido iyo aragti ku dhisan.

Haddaba, haddii dib boorka looga jafo dhammaan goobihii iyo akadeemiyadihii lagu laylin jirey saraakiisha qaranka, hoggaammada xoogga ee kala duwan, talisyada fadhiyada, cilmibaarayaasha danaha qaranaka Soomaaliyeed, sahmiyayaasha iyo wardoonka xogaha qarsoon, curiyaasha istiraatiijiyadda qaranka iyo qaabaynteeda, waa marag-madoonto in ay soo noqonayso haybaddii iyo xurmaddii uu lahaa ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya. Tababarka gudaha lagu qaadanayo oo la soo celiyo; ayaa ka dhigan xoojinta, xulashada caqiidada ciidanka lagu carbinayo. Halka, uu yahay tababarka dalka dibaddiisa lagu soo qaadanayo mid barxan oo aan ka turjumayn bedqab caqiido iyo aragti ummadeed oo shirraban.

# BARBAARINTA & GARDAADINTA

### HAL-DOORKA BULSHADA

1. MAXAA LOOLA JEEDA HAL-DOORKA BULSHADA: Bulsho kasta waxa ay leedahay dad hormuud iyo xeerbeegti u ah iyo dad hal-door loogu yeero oo ah kuwo asteeya meesha la degayo ama reerka lagu furayo. Waxa jira ereyo iska macne ag dhow oo ku soo ururaya reyga hal-door. Dhammaan ereyadani waa ku leh macne gaar ah, xanbaarsanna nuxur iyo fahan ku dhisan ujeeddooyin kala duwan. Waxa ka mid ah ereyadan isku bahda ah marka laga hadlayo dhanka fahanka iyo macnaha guud; horseedka, horweynta, hormuudka, hoggaanka, indheer-garadka, foolaadka, labeenta, qoorweynta, qammaammurta, gargayrtida, madaxyaweynta, mudantida iyo hal-doorka.

Hal-doorka bulshada waxa loola jeedaa waa, "dadka ugu mudan ama ugu firfircoon bulshada", kuwaas oo leh saamayn weyn oo togan ama waxay bulshada ugu jiraan meel muhiim ah. Hal-doorka, waxaa loo arkaa shaqsiyaad leh hibo, karti, aqoon, iyo hoggaamin bulsho, kuwaas oo door muhiim ah ka qaata horumarinta iyo hagaajinta nolosha bulshada inteeda kale. Waxaa ka mid noqon kara hal-doorka hoggaamiyayaasha, aqoonyahannada, ganacsatada, saamileyda siyaasadda, culimada, bahweynta waxbarashada, iyo kuwo kale ee sida muuqtaa uga dhex muuqda bulshada isla markaana leh saamayn togan.

Haddii aan mar kale eegno ereyga (Elite) ama (**النخبة**) waxa loo adeegsadaa ama lagu tilmaama dadka ka shaqeeya dhiirrigeliya bulshada, tusaale fiican u noqda qaybaha kale ee bulshada—kuna dadaala sidii ay bulshada u hagi lahaayeen ama u barbaarin lahaayeen. Waxa hubaal ah in bulshada ka koobantahay laba qaybood oo kala ah; hoggaan sare iyo shaqaale hoose. Hoggaanku waxa uu tusaale ka yahay cidda diyaarisay, barbaarisay, garabqabatay, ku shubtay falsafadda nolosha uu ku dhex dabaalanayo, una jeexday dariiqa iyo wadiiqada uu u marayo habka uu wax maamulayo.

Sidoo kale, waxa iyana mudan inaan tibaaxno ama ishaarno in mar kasta bulshada "qaybta shaqaalaha ahi u baahanyihiin barbaarin iyo jihayn joogta ah, waa in ay helaan laylin iyo diyaarin lagu kaabayo aqoontooda, garaadkooda, hab-fekerkooda iyo in ay ilaaliyaan shuruucda dalka iyo dadkaba, laguna ilaaliyo inaysan ka bixin xayndaabka qarannimada iyo danta guud" Haddii aan fahanka iyo nuxurka soo dhoweynno, waxa jira dad caan ah, oo loo sameeyay si waafaqsan halbeegyo laga yaabo inay ku dhisanyihiin anshax-darro iyo qarbudaad. Maxaa yeelay, ujeedka iyo hadafka loo asaasay ayaa ah, awood siin aan dabar lahayn, hor-mood ka dhigis aan xad la ahayn, iyo helidda awood iyo maamul badan oo aan cidina korjoogta ka ahayn— waxa sidan loo yeela ama qaabkan loogu barbaariyaa waa "in ay noqdaan qalab lagu dagaalamo, af lagu wadahadlo, hub lagu dumiyo fekradaha kale iyo in loo adeegsado farsamo kasta oo lagu gaarayo dib-u-dhaca dalka iyo dad kaba".

Kolka laga doodayo hal-doorka iyo labeenta bulshada Soomaaliyeed, kuma koobna saamileyda siyaasadda oo keliya. Bal waxa jira kooxo ku suntan diin, aqoon, dhaqan, dhaqaale, warbaahin, farshaxan, ciyaaro iyo hal-abuurrada bulshada. Dhamman qaybaha ni waxay samayn xun iyo mid fiicanba ku leeyhiin kala-soocidda bulshada, jihaynta bulshada, carbinta ra'yiga dadweynaha iyo maaraynta dadweynaha.

2. YAA JAANGOOYA (GARDAADIYA)? Dal marka uu burburo waxa la burbura wax kasta oo tilmaan u ah gobannimadiisa, xorriyaddiisa, doonistiisa, masaalixdiisa iyo wax kasta oo ku gadaaman badbaadinta dadkiisa. Dal burburay waxa uu baylah u yahay in loo carbiyo ama diyaarsho dadkii qaban lahaa hoggaankiisa, taladiisa, geed-fadhigiisa iyo ka arrimintiisa guud ba. Waxa loo tababaraa kaadir u heeggan fulinta dano gaar ah iyo xaqiijinta qorsheyaal ka baxsan danaha dalkiisa. Haddii aan is weydiinno su'aashan ah; ilaa intee in le'eg ayay danta gaarka ahi ku tumanaysaa danta guud? Ubucda iyo nuxurka marka aan soo koobno waxa jaangooya hal-adoorka bulshada Soomaaliyeed;

- Bulshada Lafteeda: Bulshooyinka ayaa guud ahaan leh door muhiim ah oo ay ku aqoonsato hal-doorkeeda, iyadoo qiimayn ku samayneysa kartida, dadaalka, iyo saamaynta qofeed ee ku leeyahay bulshada dhexdeeda.
- Hoggaamiyeyaasha Dhaqanka: Hoggaamiyeyaasha dhaqanka ayaa leh kaalin mug weyn sida odayaasha dhaqanka, cuqaasha, iimaamyada, malaaqyada, waberrada, boqorrada, ugaasyada iyo waxgaradka kale ee deegaanka ayaa inta badan door ka qaata jaangooynta hal-doorka. Iyagu waxay soo saaraan qofka ay u arkaan inuu u qalmo ama ay ay ka arkaan dantooda gaarka ah, weliba iyagoo ku salaynaya dhaqan iyo caado bulsho ee aan ka eegayn danaha qaranka iyo masalaxadda guud dowladnimada.
- Hay'adaha Dowliga ah & Bulshada Rayidka ah: Hay'adaha dowliga ah iyo kuwa bulshada rayidka ah waxa ay sidoo kale, kaalin ku leeyihiin jaangoynta hal-doorka iyo foolaadka bulshada, gaar ahaan iyagoo soo xula una aqoonsada shakhsiyaad si gaar ah uga dhexmuuqda bulshada, lana siiyo abaalmarino, xilal, ama taageero bulsho. Lamana yaqaan xulashada shakhsiyaadkaas iyo cidda gadaal ka taagan oo soo barbaarisay.
- Warbaahinta & Baraha Bulshada: Warbaahinta iyo baraha bulshadu waxa ay door muhiim ah ku leeyihiin kor u qaadista iyo aqoonsiga hal-doorka. Warbaahinta ayaa inta badan soo bandhigta shaqsiyaadka

waxqabadka wanaagsan ku leh bulshada, taas oo ka dhigta kuwa sumcad ku leh bulshada dhexdeeda. Sidoo kale, warbaahintu waxa ay si fudud u baahisaa ama dadweynaha uga dhaadhicisaa shakhsiyaad aan wax aqoon ah loo lahayn, la aqoon ra'yigooda, doonistooda, afkaartooda, cidda ay u adeegayaan iyo halka ay ka soo shidaalqaateen.

- Aqoonyahannada & Culimada: Dadka aqoonta leh iyo culimada bulshada ku dhex nool ayaa mararka qaar jaangooya hal-doorka iyo nukhbada bulshada, iyagoo ku qiimeeya hufnaanta iyo dadaal-shaqsiyaadkooda. Waxa ay tusaale ahaan u aqoonsadaan kuwa leh hibo gaar ah, karti, waxqabad saamayn leh, bulshada na wax tar u leh. Inta badan, waxa dhacda ama xaqiiqo jirta ah aqoonyahanka iyo culumadu inay yihiin kuwo u janjeera aragtiyo shisheeye, haddaba, ma yihiin kuwo u adeegaya danaha dalkooda, dadkooda iyo dowladdooda? Dowlad xoog leh, ku dhisan falsafad adag iyo siyaasad cad oo la yaqaan waxa ay xaqiijinayso ayaa aqoonyahanka iyo culumada qaabayn karta, haddiise ay helaan goof bannaan oo aan dowladi ka jirin shaki kuma jiro in cid kale ay wax u fulinayaan.

3. QAABKEE LOO ABABIYAA? Hal-doorka bulshada waxaa lagu ababiyaa habab kala duwan oo diiradda saaraya hibo, hufnaan, iyo hoggaamin togan, waxaana ka mid ah:

   - Waxbarashada & Tababarrada: Waxbarashadu waa habka ugu weyn ee lagu kobciyo kartida hal-doorka bulshada. Waxbarasho tayo leh iyo tababar ku saabsan xirfadaha hoggaaminta, xiriirka bulshada, iyo anshaxa ayaa muhiim u ah dhisidda haldoorka. Waxaa loo abaabulaa siminnaaro, aqoon is-weydaarsiyo, iyo barnaamijyo waxbarasho oo kor u qaada xirfadaha iyo aqoonta haldoorka.

   - b. Dhiirrigelinta Hufnaanta & Akhlaaqda: Akhlaaqda wanaagsan iyo hufnaanta waa astaamo muhiim ah oo lagu tarbiyeeyo hal-doorka bulshada. Waa muhiim in bulshada iyo waalidiintu dhiirrigeliyaan shaqsiyaadka hufan oo leh akhlaaqda wanaagsan, kuwaas oo tusaale wanaagsan u noqon kara bulshada inteeda kale. Tusaalaha wanaagsan ee lagu barbaariyo guriga iyo iskuulada wuxuu door muhiim ah ka qaataa barbaarinta hal-doorka wanaagsan.

   - Kaalinta Horumarineed & Hogaamineed: Hal-doorka waxaa lagu ababiyaa iyagoo lagu dhiirrigeliyo in ay qaataan kaalin muhiim ah oo bulsho, kuwaas oo ku jihaynaya waajibaadyo mas'uuliyadeed. Kuwo waxqabad, muujiya hoggaamin fiican. Sida caadada ah ama dhacdaba inta badan dadka firfircoon ayaa la siiyaa mas'uuliyado dheeraad ah oo bulshada dhexdeeda ah, si ay ugu adeegaan dadkooda una kasbadaan xirfado dheeraad ah.

   - Horumarinta Xirfadaha Isgaarsiinta & Xalinta Khilaafaadka: In la baro hal-doorka xirfadaha isgaarsiinta iyo xallinta khilaafaadka waxa ay sare u qaaddaa awooddooda hoggaamineed. Waxaa muhiim ah in la siiyo fursado ay ku bartaan sida looga hadlo madalaha, loo dhageysto dadka kale, iyo sida dhibaatooyinka loogu xalliyo si nabad ah oo deggan.

   - Taageero & Dhiirrigelin bulsho: Hal-doorka bulshada waxaa lagu ababiyaa iyagoo hela taageero buuxda oo bulshada ka timaadda, oo ay ku jiraan waalidiinta, macallimiinta, iyo hoggaamiyeyaasha. Taageerada bulshadu waxa ay dhiirrigelin u tahay hal-door kasta si uu u horumariyo xirfadaha iyo saamaynta uu ku leeyahay bulshada.

   - Korinta Qiimaha & Wacyiga Bulshada: Haldoorka waxaa lagu tarbiyeeyaa ama lagu barbaariyaa in uu ogaado qiimaha bulshadiisa iyo sidii uu wax uga beddeli lahaa caqabadaha jira. Bulshooyinka qaar waxa ay bixiyaan tababaro diiradda saaraya wacyigelinta bulshada iyo sidii loo horumarin lahaa anshaxa iyo hannaanka bulsho. Hal-door kasta, waxa uu u baahan yahay barbaarin, waxbarasho, iyo fursado horumarineed oo diiradda saaraya kartida iyo hufnaanta shaqsiga. Waalidiinta, macallimiinta, iyo bulshadu waa inay iska kaashadaan sidii loo dhisi lahaa hal-door wanaagsan oo wax tar u leh bulshadiisa.

4. YEY U ADEEGAAN OO DHEEFSADA? Barbaarin kasta oo adduunka soo martay ama ka jirta waa hubaa oo cid ayaa geed-fadhi u ah , dheefsatana. Marka aan si qumman u sharraxno dheefsiga hal-doorka iyo hormuudka bulshada waxa ay ku soo urureysaa in ay u adeegaan cidda leh gardaadintooda kowaad. Sidoo kale, haldoorka bulshada waxa dheefsada dad kala duwan iyo qaybaha bulsho ee hoos ku xusan:

- Bulshada Guud: Hal-doorka bulshada waxa ay si toos ah ugu adeegaan bulshadooda iyagoo tusaale wanaagsan u noqda, wax ka beddela horumarka bulshada, iyo inay abuuraan isbeddel togan. Dadka ku xeeran ayaa ka faa'iidaysta aragtidooda, dadaalkooda, iyo hoggaamintooda.
- Dhallinyarada iyo Jiilka Soo Koraya: Hal-doorka bulshada waxa ay tusaale fiican u noqdaan dhallinyarada iyo jiilka soo koraya, iyagoo dhiirrigeliya hamiga iyo riyada dhallinyarada. Waxa ay ka caawiyaan dhallinyarada in ay bartaan xirfadaha hoggaaminta, anshaxa wanaagsan, iyo sida loogu adeegayo bulshada.
- Hay'adaha Dowliga ah & Bulshada Rayidka ah: Hay'adaha dowliga ah iyo kuwa bulshada rayidka ah wax aay ka faa'iidaystaan hal-door wanaagsan oo si xirfad leh uga shaqeeya arrimaha bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, iyo nabadgelyada. Hal-doorka waxa ay qayb ka qaataan qorsheyaasha iyo mashaariicda loogu adeego bulshada.
- Qoyska & Qaraabada: Qoysaska iyo ehelada hal-door kasta ayaa sidoo kale ka faa'iidaysta dadaalka iyo sumcadda hal-doorkooda. Waxa ay heli karaan tusaale wanaagsan oo kor u qaada qiimaha qoyska iyo sharafta ay bulshada ku leeyihiin.
- Ganacsiyada & Suuqyada Shaqada: Hal-doorka bulshada, gaar ahaan kuwa xirfadaha iyo ganacsiyada ku wanaagsan, waxa ay door muhiim ah ka qaataan kobcinta dhaqaalaha bulshada. Waxay abuuraan shaqooyin, dhiirigeliyaan ganacsiyo cusub, una horseedaan bulshada fursado dhaqaale oo horumarineed.
- Deegaanka & Dadka Ku Dhaqan: Hal-doorka bulshada waxa ay sidoo kale u adeegaan deegaanka ay ku nool yihiin. Waxa ay bulshada baraan wacyiga ilaalinta deegaanka iyo dhaqamada wanaagsan ee daryeelka deegaanka, sida nadaafadda, keydinta kheyraadka, iyo ilaalinta deegaanka dabiiciga ah.

## GUNAANAD

Haldoor kasta waxa uu door muhiim ah ka qaataa nolosha bulshada iyo dad badan oo kala duwan, iyagoo abuuraya isbeddel, dhiirigelin, iyo horumar. Dadka oo dhan ayaa si toos ah ama si dadban uga faa'iidaysta haldoor wanaagsan ee ku dhex jira bulshadooda. Soomaaliya oo ah dal ka soo kabanaya colaado ku raagey iyo khilaafaad siyaasadeed ayaa baahi weyn u qaba hal-door aragti leh iyo xaqiijin karana waxa dowladdiisu doonayso, ka dhabayn kara geeddi-socodka iyo fulinta qorshihiisa qaran. Inta Soomaaliya kaadirkeeda iyo hal-doorkeeda ay marti uga tahay waddamo shisheeye in ay u carbiyaan waxa hubaal ah inaan si dhakhso ah looga soo kaban karin wixii burbur iyo colaado inna soo maray. Mudnaan iyo muunaynba waxa mudan inaan maanka ku haynno jaalle "hufnaanta shaqada, gudashada waajibaadka, hirgelinta xuquuqaha, dhaqan-gelinta sharciga, hoggaaminta suubban, qorshaynta isku jaan go'an, geeddi-socodka toosan, sahminta ku dhisan ogaalka iyo aqoonta, kobcinta dhaqaalaha, jihaynta dhallinyarada, dhisidda wacyiga bulshada iyo ilaalinta bedqabka diinta Islaamka ayaa ah DOWGA NOLOSHA SAXDA AH LOO MARO."

**W/Q:** Maxamuud Cali Aadan Hoorri

# WAXBARASHADA IYO TIKNOOLAJIYADA: SAAMAYNTA "GARAADKA ARTIFISHALKA AH" (ARTIFICAL INTELLIGENCE)"



Dr. Mohamoud A. Mohamoud



Xigashada Sawirka: Dugsiga Sare ee Cumar Samatar

## HORDHAC

Xilligan qallafsan ee ka dhashay colaadda daba-dheeraatay iyo dagaalka sokeeye ee naafeeyey dalkii, dadkii iyo diintiiba, wuxuu sababay in uu ka dhigo dadaalka loogu jiro dib-u-dhiska qaran fool aad u adag iyo rafad xanuun badan. Wadamada ka soo kabanaya colaadaha oo aynu hormuudka u nahay, kaabayaasha waxbarashada ayaa ah, inta badan, goobaha ugu horeeya ee la burburiyo ama la boobo. 35 sano oo lagu jiray burburka iyo barokaca, waxaa dumay dugsiyadii, waxaa barakacay macallimiintii iyo qoysaskii ardayda, waxaana gebi ahaanba baaba'ay agabkii wax lagu baranayey. Natiijada ka dhalatay burburkaas iyo barokacaas aad bay u kharaar tahay: waxqabadka tacliinta oo hooseeya ama aan jirin, tayada waxbarashada oo liidata ama aan la isku hallayn karin, iyo jiil dhan oo carruur iyo dhallinyaro ah oo mustaqbalkoodu lumay ama halis ugu jiro in uu lumo (bulshada 70% waxaa da'dooda ka yartahay 30 sano jirro).

Sida dabiiciga ah ama soo jireenka ah (The traditional way), jawaabta arimahaan looga falcelinayo waa in dib loo dhiso dugsiyada, macallimiinta dib loo tababaro, goobaha waxbarashada oo la qalabeeyo iyo agabka waxbarashada oo la diyaariyo lana qaybiyo. Falcelinta noocaan ahi waa lama huraan, waxaana hubaal ah in ay wax wayn ka qaban karto soo kabashada waxbarashada iyo dib u soo noolaynta nidaamkeeda.

Sidaas oo ay tahay, haddana falcelintan inta badan waxay u baahan yahay hanti iyo dhaqaale aad u baaxad way, agab aad u badan, hoggaan iyo dhaqan-siyaasadeed xooggan ayna ka go'an tahay dib-u-dhis iyo daacadnimo. Iyada oo aan ahmiyadeeda hoos loo dhigayn, waxaa cad ama iswaydiin mudan in faragelinta noocan ahi (traditional intervension) aysan si dhakhso leh uga jawaabi karin baahida degdegga ah ee loo qabo waxbarasho baahsan oo leh tayadii iyo tiradii loo baahnaa laguna hirgelin karo muddo aad u xaddidan iyo kharash ama dhaqaale kooban. Su'aashu waxay tahay: ma jirtaa waddo kale oo ka fudud, ka kharash yar, ka waxtarsan oo loo mari karo soo kabashada waxbarashada iyo kor u qaadida tayo iyo tiro labadaba?

Maqaalkan kooban, waxaa ku falanqayn doonaa waxbarashada iyo tiknoolajiyada iyo isbedelka ay keeni karto. Si gaar ah waxaan tooshka ugu qaban doonaa tiknoolajiyada "Garaadka Artifishalka ah (Aritificial Intelligence)", saamaynta togan ama taban ee uu ku yeelan karo waxbarashada iyo dedejinta isbedelka loo baahan yahay. Waxaan faah-faahin iyo falanqayn ku filan ka bixin doonaa adeegsiga labada nooc ee Garaadka Artifishalka ah (Artificial Intelligence) oo kala ah: mid Wax Curinaya (Generative AI) iyo mid Wakiil ah (Agentic AI).

## XAALADDA WAXBARASHADA

Inta aynaan ka hadlin xalka iyo doorka tiknoolajiyaa, waa in aan marka hore fahamnaa inta ay dhibaatada xaalada hadda jirtaa ee waxbarashada dalka guud ahaan ama tan deegaanka gaar ahaan qoto dheer tahay. Waxbarashada Soomaaliya iyo weliba tan deegaanka Puntland gaar ahaan, waxay la il daran tahay:

• **Burburka Kaabayaasha Waxbarashada:**

Waxaa aad u yar ama u tabar daran dhammaan kaabayaasha waxbarashada noocyadeeda kala duwan. Helitaanka waxbarashada hoose (Primary education) aad bay u liidataa waxaana xoguhu tibaaxayaan in 3 dii ilmood oo xaq u lahaa in ay iskuul helaan marxalada dugsiyada hoose ay u suurtagasho in hal ka mid ah uu waxbarasho aado. Helitaanka dugsi sare iyadu waa ka sii xag jirtaa: 10 kii ilmoodba waxaa dugsi aada hal ilmood. Dugsiyada iyagu jira ee hadda wax lagu dhigto, in badan oo ka mid ah, ma ahan meelo/goobo ku habboon in ilmo wax ku bartaan marka laga eego dhanka badqabka iyo caafimaadka (health and safety). Agab waxbarasho oo ku filan ama leh tayadii loo baahnaa iyada waxkiisuba ma jiro.

• **Yaraanta Macallimiinta iyo Mooralkooda Hooseeya:**

Waxaa jira macallimiin yaraan aad u baahsan. Sida xoguhu tibaaxayaan, macallimiinta tababaran ee la isku hallayn karo waxay ka yar yihiin 10 macallinba 4. Mooraal ahaan, macallimiinta waxay qabaan niyad jab wayn iyaga oo aan helin dhaqaale ku filan oo ay ku noolaan karaan ama reer ku dhaqan karaan. Ma helaan tababaro tayadooda aqooneed kor loogu qaadayo. Sidoo kale ma haystaan kalsooni buuxda oo ah in ay shaqo helayaan ama sii joogayaan.

• **Jiilka Waxbarashada ka Lumay:**

Sida ay tilmaameen ilo wareedyo lagu kalsoon yahay, waxaa waxbarashada ka maqan tiro ilmo aad u badan. Inta xoguhu tibaaxeen waxay gaaraaysaa trida ilmaha waxbarashada ka maqan oo gaaray da'dii ay waxbaran lahaayeen in ka badan 3 milyan

oo ilmood (goobaha la degan yahay oo keliya), Soomaaliya oo dhan. Tirakoobyada la cuskado waxay tibaaxayaan, in ilmaha da'doodu u dhexeyso 5 ilaa 7 sano lagu qiyaasi karo in ay ka yihiin bulshada 5 ilaa 6 milyan. Taas oo ka dhigan in 50%-60% tirada guud ee ilmaha gaaray waxbarashada aysan helin waxbarasho, gaar ahaan kuwa ku nool deegaanada la degan yahay (magaalooyinka iyo tuulooyinka). Haddii lagu daro reer guuraaga, tirada ilmaha aan helin waxqabarashada waxay gaari kartaa 5 – 8 milyan guud ahaan Soomaliya. Qiyaastii deegaanka Puntland, tirada bulshada ku nool waxay ka tahay tirada guud ee Soomaaliya ~ 20%, ilmahana waxaa waxbarashada ka maqan in u dhiganta boqolayda kore.

**• Tayada oo Liidata iyo Manhajka oo aan Shaqeyn:**

Manhajyada waxbarasho hadda ka jira deegaanada kala duwan ee Soomaalia (Federearl vs. States) waa kuwo duugoobay, si siyaasadeysan loo farsameeyay ama maalgelinta oo yar darteen loo hololobiyey, iyagoo ku guuldaraystay inay wax la taaban karo ka bedelaan nolosha bulshada iyo hab-dhaqankooda, sida nabad-dhisidda, kor-u-qaadida qiyamka, iyo ka-qaybgalka adeegga bulsho. Xitaa haddii manhajku noqon lahaa mid lagu taagsan karo intii tabar ah, macallimiinta iyo maamulka aan tababarnayn, tayadooduna liidato waxay ka dhigan tahay in manhaj wanaagsan aan loo fulin karin sidii la rabay, isbedelna keeni karin.

**• Maamul iyo Xog La'aan:**

Wasaaradaha waxbarashada inta badan waa taag daran yihiin, mana laha awood wax ku ool ah oo ay ku maamulaan hannaanka waxbarashada ama ku hagaan si wax ku ool ah ama horseedi karta isbedel lagu naaloodo. Waxaa liidata iska warhaynta iyo isku xirnaanta maamulada dugsiyada, jaamacadaha, koleejyada iyo wasaaradaha waxbarashada. Waxaa aad u hooseeya kormeerka iyo kantaroolka waxbarashada iyo goobaha wax lagu dhigayo ama sida wax loo dhigayo. Xog buuxda lagama hayo sida ilmuhu wax u bartaan, waxa ay bartaan iyo horumarka ay samayenayaa dhanka aqoonta, akhlaaqda iyo nolosha intaba.

## WAXBARASHADA IYO TIKNOLOJIYAGA

Sida ugu dhakhsaha badan, inoona suurta gelin karta in muddo kooban looga soo kaban karo burburka waxbarasho iyo mid bulsho ee baahsan sida ka muuqata xaaladda waxbarashada ee kor ku xusan, tallabada ugu habboon waa in la taagsado tiknoolajiyada casriga oo u koraysa si xawli ah. Adeegsiga tiknoolajiyada wuxuu isbedel lama filaan ah oo deg deg ah iyo saamayn wayn ku yeelanayaa dariiqada iyo qaabka ardadu wax u baranayso, sida macallimiintu wax u dhigayaan iyo sida loo maareeynayo ama maamulayo waxbarashada. Saamayntaan waxay si gaar ah u dedejinaysaa dib u dhiska hanaanka waxbarasho, waxayna noo suurtagelinaysaa in muddo kooban aan kula qabsan karno ama tartami karno dowladaha deriska ah iyo adduunka intiisa kale.

Tiknoloojiyadu waxay saamayn toos ah ku yeelanaysaa dhinacyada soo socda:

- Tiknoolajiyadu waxay suurtagelinaysaa in laga guuro nidaamka waxbarasho ee ah in hal-saab lagu wada jiro (One size fits all), waxayna sahlaysaa in qofkasta wax u barto sida ku habboon awooddiisa ama ku sarg'an fahamkiisa, waqtiga uu wax ku baran karo oo ku jaan go'an baahidiisa qofeed iyo kobociisa gaarka ah (Personalised learning). Arinkani waxay kor u qaadaysaa la falgalka ardayga iyo ka falcelintiisa waxbarashada.
- In cid kasta meel kasta ha heli karo waxbarashada ay danaynayso iyadoo la adeegsano degelo dijital ah (Digital platforms) iyo waxbarashada elektarooniga ah (e-learning), meeshana ka saaraysa kala qoqobnaana juqraafiyadeed iyo in waxbarasho loogu safro dhul durugsan. Arinkani waxay suurtagelinaysaa in helitaanka waxbarasho tayo leh aysan ku xadidnayn goob iyo magaalo keliya oo qofku isaga oo gurigiisa ama tuuladiisa jooga uu heli karo waxbarashadii uu u baahnaa.
- Kor u qaadida xirfadaha macallinka iyo tan maamul iyadoo la adeegsanayo aalado dijitaal ah oo lagu gudbinayo, lagula soconayo, lagu kantaroolayo waxbarashada ardada, laguna helayo xogta dhabta ah ee ardayda. Arinkani waxay hoos u dhigaysa culayska maamul iyo maarayn ee waxbarashada, waxay u sahlaysaa macallimiinta in ay sameeyaan qiimayn aqoonta ardayga si fudud oo dhakhso badan (isla goortaas), iyo in ardayga si firfircoon loola falgalo marka wax la barayo.

Sidaas oo ay tahay, in si dhakhso ah loo adeegsado tiknoolajiyadu kama marna caqabado iyo in loo

gogol xaaro. Caqabadaha ugu waawayn ee hortaagan ama hor istaagi kara in la hirgeliyo adeegsiga tiknoolajiyada ee waxbarashada waxaa ka mid ah:

- In korontada, internet-ka iyo agabka dijitalku uusan wada gaarin dadka oo dhan.
- In manaahijta waxbarashada iyo agabka waxbarasho ee hadda jira aysan si buuxda ula saanqaadayn tiknoolajiyada casriga una baahantahay in si buuxda maalgelin loogu sameeyo casriyayntooda ama tababaridooda.
- In aysan weli jirin siyaasad waxbarasho iyo qorshe loogu gogol xaarayo in loo hayaamo jihada adeegsiga tiknoolajiyada, macallimiinta iyo maamulkana loo tababaro sidii ay uga mira dhalin lahaayeen adeegsigooda.

## DOORKA "AI" EE WAXBARASHADA: TAB IYO XEELAD CUSUB

"AI" ma ahan hal nooc oo tiknoolajiyad oo keliya ee waa xirmo-kartiyeedyo (Complex set of capabilities) loo adeegsan karo in lagu xalliyo caqabadaha nolosha ee adag, gaar ahaana waxbarashada iyo kobcinta kartida aqooneed iyo mid xirfadeed ee qofka iyo hay'adaha kala duwan (mid guud iyo mid gaarba). Xagga waxbarashada, kor u qaadida tayada iyo kartida qofeed marka ay noqoto, "AI" waxaa loo kala saari karaa laba nooc oo guud: "AI"-da Wax-Curinta (Generative AI) iyo "AI"-da Wakiilka ama Caawiyaha ah (Agentic AI). In la kala fahmo labadaan nooc iyo saamaynta uu midkasta leeyahay waxay muhiim u tahay in la fahmo doorka ay ku yeelan karaan waxbarashada iyo tayaynta qofka.

"AI"-DA WAX-CURINTA (GENERATIVE AI)

"AI"-da Wax-Curinta (GenAI), oo ay tusaale u yihiin: ChatGPT, Gemini, Bard, Capilot iyo Claude, waxaa loo diyaariyay inay abuuraan ama curiyaan wax cusub sida qoraal, sawirro, koodh (Code), iwm., iyadoo lagu taagsanayo, waxna ku dhisaya xogo ballaaran oo ku kaydsan (Large database). Marka ay noqoto u adeegsiga waxbarashada, awoodda iyo doorka "AI"-ga noocaan ahi waxa ay ka muuqanaysaa sida ay u samayn karaan hal abuur ku dhisan hadba qofka waxa uu rabo, mustawihiisa aqooneed, iyo baahiyihiisa gaarka ah.

"AI" Wax-Curiyaha ah (GenAI), wuxuu ka dhigan yahay sida qof hal-abuure ah oo qoraya, samaynaya cilmi-baaris, hindisaya sawiro farshaxan, fiidiyowyo, xallinaya mas'alooyin xisaabeed ama qoraya koodh-ka baroogaraamada kumbuyuurada (Programme codes). Noocaan wuxuu keliya oo uu hawlgalaa marka aad adigu wax ka dalbatid sida in uu mowduuc wax ka qoro, buug soo koobo iwm., iyadoo la adeegsanayo carin ama jihayn (Prompts or Instructions), adiga oo u sheegaya waxa aad ka rabtid in uu qoro, sawiro iyo naqshadeeyo.

## WAXTARKA "GENAI"

- **Waxbarasho Qofaysan (Personalised Learning)**

"GenAI" wuxuu kuu diyaarin karaa qorshayaal si casharro ah loo sameeyay, su'aalo layliyaal lagu tababaran karo, iyo sharraxaadyo ku habboon baahida gaarka ah ee ardayga, qaabka uu wax u baran karo, iyo xawaaraha uu wax ku baran karo. Ardayga dhib ku qaba fikrad ama fahamka mowduuc, "GenAI" wuxuu siin karaa sharraxaad fudud oo wata tusaalayaal la fahmi karo, halka ardayga waxbarashada ku fiican uu ka siin karo masalooyin iyo su'aalo aad u adag oo u baahan in uu xalliyo sida ku habboon qofkasta mustawihiisa.

- **Yaraynta Culayska Macallinka (Reducing Teacher Workload)**

Deegaannada ay macallimiintu ku yar yihiin, shaqadu ku badan tahay, mushaharkuna ku yar yahay, "GenAI" waxay noqon kartaa caawiye qiimo badan, wax wayna wax ka bedela hanaanka waxbarashsada. Wuxuu awood u yeelan karaa hawlaha maamulka sida qorista qorshayaasha casharrada, abuurista su'aalaha, sixidda imtixaanaadka, soo koobidda maqaallada adag si loo waafajiyo heerarka akhriska ee kala duwan, iyo diyaarinta jawaabo iyo qorshayaal gaar ah ee ku saabsan shaqooyinka macallimiinta, taasoo u

oggolaanaysa inay diiradda saaraan la-tacaalidda ardayda tooska ah iyo la-talintooda, halkii ay kaga mashquuli lahaayeen wax diyaarin.

- **Kor U Qaadka Helitaanka Waxbarasho (Enhanced Accessability)**

Ardayda waxbarashada ka maqnaa sanado badan, "GenAI" wuxu u abuuri karaa agab waxbarasho oo deg deg ah (Learning material). Wuxuu kale oo u tarjumi karaa agabka waxbarashada ku qoran afafka uusan ardaygu aqoon, u soo koobi kara casharada dhaadheer ama buug dhan, cod ugu bedeli kara ardayga aan aragiisu fiicnayn. "GenAI" wuxuu ka dhigayaa waxbarashada mid la wada heli karo, loona siman yahay.

- **Horumarinta Xirfadaha (Professional Development)**

Yaraanta ka jirta dadka wax tababari kara darteed, "GenAI" wuxuu u adeegi karaa sidii tababare horumarineed ama kobcinadeed ee xirfadaha macallimiinta iyo maamulka oo diyaar ah 24/7. Wuxuu macallimiinta iyo maamulka ka caawin karaa in ay helaan xeeladahii iyo istaraatiijayadii ay ku maaraayn lahaayeen fasalada, casharada iyo guud ahaan arrimaha iskuulka.

## WAXYEELOOYINKA "GENAI"

- **Saxnaanta iyo Qaldanaanta (Accuracy & Bias)**

Moodalada kala duwan ee "GenAI" waxay kaliya oo ay ku kala fiican yihiin ama waxtar badan yihiin xogta lagu tababaray iyo baaxadeeda. Waxay mararka qaar mala-awaali karaan macluumaad khaldan ama sii wadi karaan fikradaha qalloocan ee ku jira xogta ku kaydsan. Waxay sidoo kale abuuri karaan ilo xogeed aan jirin (Citation hallucination). Arintani waxay noqon kartaa mid aad u khatar ugu ah bulshada ka soo kabanaysa colaadaha ama aysan si mug leh u qornayn taariikhahooda, dhaqankooda, ilo-xogadyahooduna sugnayn. Way adkaan kartaa in la ogaado ama lagu baraarugo haddii "GenAI" uu soo bandhigayo qallooca taariikheed, xogeed ama siyaasadeed ee ay banka-abuuraan.

- **Hufnaanta Tacliinta iyo Ku Tiirsanaanta Xad-dhaafka Ah (Integrity & Over-reliance)**

Welwel weyn wuxuu ka jiraa in ardaydu ay u isticmaali karaan "GenAI" si ay u dhammaystiraan laylisyadooda, ama shaqo guriyeedkooda iyagoon si dhab ah u fahmin, taasoo curyaamin karta horumarka fikirka, xallinta mashaakilka, iyo kartida ardayga ee akadeemigga ah.

- **Dadka oo aan wada heli karin (Digital Divide)**

Inkasta oo "GenAI" uu yahay aalad awood badan, muhiimna u ah in ay nolosha guud ahaan iyo waxbarashada gaar ahaan wax wayn ka bedeli karto, haddana in la adeegsado waxay u baahantahay helitaanka internetka iyo agab ku habboon sida moobayl casri ama kombuyuutar casri ah. Wadamada ka soo kabanaya colaadaha oo leh koronto iyo isku-xirnaan aan la isku hallayn karin, tani waxay sii ballaarin kartaa kala-qaybsanaanta dijital ah ee jirta. Waxaa dib u dhac ku imaanayaa bulshada danyarta halka bulshada dabaqadaha kore ay uga sahlantahay in ay la jaanqaadaan. Arinkaani waxa uu abuurayaa kala qaybsanaan dabaqado bulsho oo kala horumarsan, dhaqaale badan, helayana adeegyo nololeed oo kala tayo badan.

- **Caadifad la'aan (Lack of Human Connection)**

Inkasta oo "GenAI" uu gudan karo doorka macallinka ee wax-baridda, haddana ma beddeli karo dareenka naxariista, shucuurta, iyo xiriirka bini'aadamka ee muhiimka u ah wax-baridda wax ku oolka ah (Effective teaching), gaar ahaan ardayda leh baahiya gaar ah ama dhaawacyo maskaxeed ka soo gaareen in uu goobjoog u ahaa dilal iyo tacadiyo kale ee isaga ama ehelkiis loo gaystay (Traumatised).

## AI-DA WAKIILKA AH (AGENTIC AI)

"AI Agents" ama Wakiilada "AI", waa nooc ugu casrisan guud ahaan "AI"-yada. Si ka duwan sida uu shaqeeyo uu "GenAI" u shaqeeyo, "AI"-ga Wakiilka ah waxaa loo baroogaraameeyey ama loo diyaariyay inay si madax-bannaan u shaqeeyaan (Autonomous), go'aan u gaaraan, isla markaasna xaqiijin karaan hadaf gaar ah muddo cayiman, inta badanna iyagoo la falgalaya hannaannada kale ee jira. Waxbarashada marka ay noqoto iyo doorka ay ku leeyihiin, Wakiilladan "AI"-ga ah, waxaa loo qaadan karaa macallimiin karti badan, hawlkar ah ama kaaliyayaal maamul oo shaqooyin uu macallinku qaban lahaa u sahlaya ama u qabanaya.

## WAXTARKA "AGENTIC AI"

**• Macallinnimo Ku Sargo'an Qofka (Personalised Tutoring)**

AI-da Wakiilada ah (AI Agents) waxay ka guda ballaarantahay in ay samayso wax-curin (content creation). Waxay la socon karaan horumarka ardayga hadba markaas xaalada uu ku jiro (Real time progress), waxay aqoonsan karaan ama kashfi karaan heerka aqoonta ardayga, waxayna si ka hordeg ah u soo jeedin karaan faragelinta ku habboon heerka iyo mustawaha aqoonta iyo kartida ardayga. Waxay ardayga u diyaarin karaan muuqaal gaaban (Short videos) ama su'aalo uu ku tababaran karo (Practical problems or quizzes), korna ugu qaadi kara aqoontiisa. Waxay u shaqeeyaan sidii caawiye tacliineed oo "had iyo jeer diyaar u ah" (24/7).

**• Qiimeyn Otomaatig ah (Automated Assessment)**

AI-da Wakiilada ah (AI Agents) ma ahan oo kaliya in ay dhibco siiso su'aalaha marka ay saxayaan layliga ardayga. Waxay sidoo kale falanqeyn karaan khaladaadka iyo goldaloolooyinka ardayga iyo meelaha uu gefay si ay u lafoguraan sababka aasaasiga ah ee faham-darada ardayga ama ku kallifay in uu wax khalday. Falanqayntaas kadib, waxay ardayga u diyaarin karaan hab-waxbarasho iyo wax-baris ku sargo'an baahida shaqsi ah ee ardayga. Qof caadiga ah ama macallinka aad bay u adag tahay in ay muddo kooban ay arday-arday sidaa ugu lafaguraan mustawihiisa una diyaariyaan maaddo wax-barasho oo ku jaango'an baahida arday kasta, gaar ahaan marka tirada ardadu aad u badan tahay.

**• Falanqaynta Xogaha iyo Nidaamka (System-Level Insights)**

AI-da Wakiilada ah (AI Agents) waxay u noqon karaan dadka iyagu dejiya siyaasada waxbarashada ama maamulayaasha goobaha waxbarashada ah aalado wax wayn ka beddela shaqadooda joodtada ah (maalinlaha ah), una qabta hawla badan oo ay adkaan lahayd in la qabto ama lagu fuliyo muddo gaaban. Waxay u adeegsan karaan in uu u falanqeeyo xogga baaxadda leh ee laga uruurinayo imaatinka ardayda iyo qiimaynta kartida aqooneed ee ardayga iyo mustawihiisa una diyaariyaan warbixino wax-ku-ool ah oo ku saabsan xaaladda hannaanka waxbarashada iyo heerka wax-qabad ee ay joogto. Fallanqaynta xogaha iyo il-u-bixintooda ee ay qabtaan AI-ga Wakiiladaa (AI Agents), waxay ka caawinaysaa siyaasad-dejiyaasha in ay ogaadaan, goobaha iyo gobolada ardadoodu hoosayso, u baahan in la horumariyo, la xoojiyo tayada waxbarashada, goobaha uu agabka waxbarashada gabaabiska ku yahay ama u baahan faragelin toos ah oo togan.

**• Awood-siinta Macallimiinta (Empowering Educators)**

AI-da Wakiilka ah waxaa loo adeegsan karaa sidii kalkaaliye macallin oo kale. Wuxuu macallinka u diyaarin karaa jaantusyo (dashboard) ku saabsan kartida, mustawaha, firfiircoonida ardayda iyo waxqabadkiisa. Wuxuu si gooni ah u calaamadin karaa ardayda ay timid hoos u dhaca ama lumiyay xiisihii iyo rabitaankii in ay waxbartaan, taasoo u oggolaanaysa macallinka inuu sameeyo faragelin ku habboon.

## WAXYEELOOYINKA AGENTIC AI

**• Qaalinimo iyo Khibrad Farsamo (High Initial Cost & Compexity)**

In la hirgeliyo "AI"-da Wakiilada ah (AI Agents) ee casriga ah waxay u baahantahay maalgashi dhaqaale iyo khibrad farsamo oo inta badan ay adag tahay in laga helo dad badan oo yaqaan ama u tababaran waddanka gudihiisa. Nidaamka uu ku shaqeeyo "AI" Wakiilada ah aad buu uga guda ballaaran yahay, ugana farsama culus yahay nidaamka "AI" ee Wax-Curinta.

**• Welwel Dhanka Anshaxa iyo Xogaha (Ethical & Privacy Concerns)**

"AI"-da Wakiilada ah waxay ururiyaan xog aad u ballaaran oo ardayda ku saabsan iyo cid kasta

oo isticmaalaysa. Waxaa jira su'aalo akhlaaqeen aad la isu waydiinayo oo ku saabsan ilaalinta xogta, amniga xogta, iyo khalal algorismiga ah oo ku imaan kara, bixina kara warbixino aan sugnayn. Barnaamij isagu iskiis go'aan uga gaaraya hanaanka waxbarasho ee ardayga ama hagaya dariiqii uu mari lahaa, haddii looga cabsi qabo in khalal ku imaan karo wuxuu leeyahay khatarkiisa, wuxuuna abuuri karaa welwel iyo kalsooni darro mustaqbalka sida ay doonto ha u yaraatee.

- **Daah-furnaan La'aan (Lack of Transparency)**

Habka go'aan-qaadashada ee "AI"-da Wakiilada ah wuxuu noqon karaa "sanduuq madow" (Black Box), taasoo adkeyneysa in la fahmo sida uu u g'aan qaato ama sababka uu ku saleeyo sida uu u sameeyay talo bixin gaar ah. Daah-furnaan la'aantaani waxay abuuri kartaa in aan kalsooni buuxa lagu qabin qorshayaasha ku sargo'an mustawaha ama heerka aqooneed ee arday u baahan in la caawiyo.

# GUNAANAD IYO TALO SOOJEEDIN

Caqabadaha horyaalla waxbarashada wadamada ka soo kabanaya colaadaha waa kuwo aad u baaxad wayn, waxayse noqon karaan fursad hal-abuurnimo. "AI", noocyadeeda kala duwan, waxay bixinaysaa tub gaar ah oo dib-u-dhis deg deg, kharash yar loogu xoojin karo hannaanada waxbarashada. Waxay arintani badbaadin kartaa mustaqbalka malaayiin carruur iyo dhallinyaro ah oo laga xayuubiyay xuquuqdooda waxbarasho ama aan heli karin waxbarasho tayaysan. Si kastaba ha noqotee, adeegsiga "AI" ma ah khatar la'aan. In la adeegsado "AI" waa in ay garab socotaa ku baraarugsanaanta khataraha ka dhalan kara ama waxyeelooyinka uu keeni karo, gaar ahaan kuwa la xiriira ilaalinta xogaha iyo akhlaaqda.

Haddii aan soo gunaanadno, adeegsiga tiknoolajiyada wuxuu si deg deg ah u kobcin karaa waxbarashada iyo kor u qaadida mustawaha ardada ee aqooneed. Gaar ahaan, Garaadka Artifishalka ah labadiisa nooc ee "GenAI" iyo "AI Agents" oo qabta shaqooyin isku tiirsan laakiin kala duwan. Waxay in badan fududayn karaan shaqo maalmeedka macallinka, siyaad dejiyaasha iyo maamulayaasha goobaha waxbarashada heerarkeeda kala duwan.

# TALO SOOJEEDIN

1. Mudnaanta Siinta Nidaamka Isku-dhafan (Ecosystem)

Siyaasad-dejiyaashu waa in aysan soo iibsan nidaam tiknoolajiyad waxbarashao sida "AI diyaarsan keliya (Off-the-shelf) laakiin ay dhisaan nidaam isku-dhafan oo dhammaystiran. Nidaam ka kooban dhamaan barnaamijyadii loo baahnaa, mid arday, mid macallin, mid maamul, mid xog falanqayn, iyo u jid bixiya haggida siyaasadda waxbarashada intaba. Nidaam ka kooban labada nooc ee "AI" iyo tikinooloji kasta oo kale oo lagu kabi karo, lana jaanqaadi karta.

2. Ku Habboon Dhaqan-ka iyo Diinta (Relevance)

Moodalada "AI" ee la isticmaalo waa in lagu tababaraa mabaadi'da iyo anshaxa dhaqan wanaanga iyo akhalaqiyaadka Islaamka si loo hubiyo inay yihiin kuwo dhaqan ahaan xasaasi ah, luqad ahaan ku habboon, iyo kuwo la xiriira danaha iyo duruufaha gaarka ah ee bulshada.

3. Maalgelinta Qofka iyo Horumarintiisa (Human Capacity)

Arrinta ugu muhiimsan ma ahan adeegsiga "AI" lafteeda ama tiknoolajiyooyinka kale waxbarashada, laakiin waa horumarinta bini'aadamka iyo tayaynta qofka adeegsanaya. Maalgashiga ugu weyn waa in la geliyaa sidii loo tababari lahaa macallimiinta, maamulayaasha, iyo sameeyeyaasha siyaasadda gaar ahaan sidii looga faa'iidaysan lahaa isticmaalka "AI" si wax ku ool ah iyo anshax leh. Adeegsiga tiknoolajiyada ma ahan in la bedelayo macallimiinta ama la dhigayo shaqo la'aan. Waa in la horumariyo, kartidoodana kor loo qaado.

4. Sameynta Saabab Anshax iyo Siyaasad Waxbarasho (Ethical & Policy Frameworks)

Inta aan si buuxda loo hirgelin tiknoolajiyada waxbarashada, gaar ahaan “AI”-ga, waa in la hubiyo in ay jiraan ama la dejiyo saabab iyo siyaasado lagu hagayo isticmaalka tiknoolajiyadaas si kor loogu qaado waxtarkeeda, loogana fogaado waxyeeladeeda. Saababkaan waa in la geliyaa wada tashi ballaaran oo ay u dhanyihiin dhamaan daneeyayaasha ku lugta leh.

5. Hubin iyo Tijaabin (Piloting)

Halkii si buuxda loo hirgelin lahaa, waa in faragelinta lagu soo kordhinayo adeegsiga tiknoolajiya, gaar ahaan “AI” lagu tijaabiyaa (Piloting) dugsiyo, gobolo iyo goobo waxbarasho gaar ah si loo hubiyo wax ku oolnimadooda iyo isbedelka ay keeni karaan. Mudada tijaabada waa in si gaar ah loogu dhug lahaado arrimaha farsamada iyo anshaxa. Haddii lagu guulaysto mashruuca tijaabinta ayaa markaas ka dib si tartiib tartiib ah loo ballaarin karaa si waara oo gaarta dhammaan goobaha iyo deegaamada waxbarashada oo dhan.

**W/Q:** Mohamoud A. Mohamoud, PhD

Email: m.a.mohamoud@gmail.com



# YARAANTA MACALLIMIINTA DUMARKA EE SOOMAALIYA IYO SAAMAYNTA AY KU LEEDAHAY WAXBARASHADA GABDHAHA



Asmaa Sh. Cabdulqaadir Maxamed




**Xigashada Sawirka**: Creative Associates International

# HORDHAC

Yaraanta macallimiinta dumarka ee Soomaaliya, gaar ahaan Puntland, ayaa weli caqabad weyn ku ah dadaallada lagu kordhinayo helitaanka sinnaanta jinsiga iyo tayada waxbarashada. Macallimiinta dumarka ah waxay door muhiim ah ku leeyihin kor u qaadista waxbarashada hoose iyo dhiirrigelinta ka qaybgalka gabdhaha ee waxbarashada, gaar ahaan deegaanada miyiga iyo bulshooyinka dhaqanka adag. Si kastaba ha ahaatee, Macaliminta dumarku wali waa kuwo si weyn ugu yar shaqada macalinimada iyo waxbarashada. Sida lagu sheegay Falanqaynta Qaybta Waxbarashada (ESA, 2021), Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Qaybta Waxbarashada (ESSP 2023–2027), iyo Warbixinta EMIS (2025), dumarku waxay ka yihiin qiyaastii 14% macallimiinta dugsiyada hoose iyo wax ka yar 5% kuwa dugsiyada sare. Kala duwanaanshahan joogtada ah wuxuu xaddidayaa helitaanka waxbarashada ee gabdhaha, wuxuuna kahor istaagaya helitaanka sinnaan iyo tayo nidaamka waxbarashada.

# SABABAHA YARAANTA MACALLIMIINTA DUMARKA

Yaraanta macallimiinta dumarka ee Soomaaliya waxaa sabab u ah arrimo dhowr ah kuwaas oo ay ka mid yihiin:

**1. Caqabadaha Bulsho iyo Dhaqan**

Caadooyinka iyo dhaqamada bulshada ayaa weli si weyn u xaddidaya ka qaybgalka dumarka ee waxbarashada sare iyo shaqooyinka rasmiga ah. Qoysas badan ayaa weli qaba in haweenku mudnaanta siiyaan masuuliyadaha qoyska iyo daryeelka carruurta, taas oo yareyneysa fursadahooda xirfadeed. Natiijadu waxay noqotaa in gabdho yar ay dhammaystaan dugsiga sare, taasoo yaraynaysa tirada haweenka u qalma tababarka macallinnimo. ESA (2021) waxay muujisay in kulliyadaha tababarka macallimiinta, sida Garowe Teacher Education College, ay raggu ku badanyihiin, taas oo sii xoojineysa farqiga jinsiga ee xirfadda macallinnimada.

**2. Xaaladaha shaqo ee adag iyo dhiirrigelin la'aan**

Xaaladaha shaqo ee adag iyo dhiirrigelin la'aantu waxay caqabad ku yihiin dumarka doonaya inay noqdaan ama sii ahaadaan macallimiin. Kuwa loo diro miyiga iyo deegaannada fogfog waxay la kulmaan dhibaatooyin la xiriira amni la'aan, hoy la'aan, iyo gaadiid la'aan ama nolol adag. Intaa waxaa dheer, mushahar hoose iyo dib-u-dhacyada bixinta mushaharka ayaa ka dhigaya shaqada mid aan dhiirigelinayn. ESSP (2023–2027) waxay tilmaamaysaa in haddii aan la samayn dhiirrigelin qaabaysan—sida hoy, taageero daryeelka carruurta, iyo gunnooyin meelaha adag—ay adkaan doonto in la helo ama la sii hayo macallimiinta dumarka ah ee kashaqeeya meelaha fogfog oo ay adagtahay in la gaaro.

**3. Hoggaan dumar iyo tusaale wanaagsan (Role models) oo kooban**

ESA (2021, bogagga 151–152) waxay si cad u muujisay in ay jirto hoggaan dumar oo aad u yar gudaha waxbarashada, iyadoo inta badan madaxda iyo ku-xigeennada dugsiyadu yihiin rag. Tani waxay yareysaa tusaale wanaagsan u noqoshada gabdhaha iyo awoodda lagu horumarinayo siyaasado shaqaalayn oo sinnaanta jinsiga ku dhisan. Sidoo kale, Dib-u-eegistii Isku-dhafka ahayd ee Qaybta Waxbarashada (JRES, 2018) waxay iftiimisay "ka qaybgalka macallinnimada dumarka oo yar iyo hoggaanka waxbarashada," iyadoo ku baaqday in la xoojiyo sinnaanta jinsiga ee shaqaalaynta, dallacsiinta, iyo tababarka macalimiminta dumarka ah.

**4. Cunsuriyadda jinsiga ee shaqaalaynta iyo maamulka**

Shaqaalaynta macallimiinta dugsiyada badankood waxaa gacanta ku haya maamulayaasha iyo Guddiyada Waxbarashada Bulshada (CEC). Sida lagu sheegay xogaha waxbarashad iyo ESA (2021), inta badan maamulayaasha Puntland waa rag. Tani waxay horseeddaa in la helo nidaam shaqaalayn oo ragga u badan, iyadoo dumarka aan la tixgelin ama la dooran. Maadaama aysan jirin habraacyo dowladeed oo waajib ka dhigaya shaqaalayn jinsi oo dheellitiran, arrintani waxay kordhisaa sinnaan la'aanta. ESSP (2023–27, bogga 77) waxay arrintan aqoonsatay, iyadoo ballanqaadday in la xoojiyo awoodda maamulka ee maamulayaasha lab iyo dhedigba, lana dhiirrigeliyo haweenka hogaanka dugsiyada.

## CAQABADAHA IYO SAAMAYNTA

Yaraanta macallimiinta dumarka ahi waxay dhalisaa caqabado waxbarasho iyo bulsho oo dhowr ah, waxaana kamid ah:

**1. Hoos-u-dhac waxbarashada gabdhaha**

Arrintani si toos ah ayay u saameysaa helitaanka waxbarashada gabdhaha, gaar ahaan meelaha miyiga iyo xoolo-dhaqatada ah halkaas oo dhaqanka bulshada uu ka dhigayo waalidiinta kuwo ka labalabeynaya inay gabdhahooda u diraan dugsiyo aan lahayn macallimiin dumar ah. Xogta EMIS (2025) waxay muujineysaa in gobollada leh macallimiin dumar ah oo aad u yar ay yihiin kuwa leh heerka ugu hooseeya ee is-qorista gabdhaha iyo kan ugu sarreeya ee ka-tagista gabdhaha dugsiga.

**2. Tusaalayaal dumar oo yaryar iyo dhaqan ragga u janjeera**

Marka gabdhuhu arki waayaan macallimiin dumar ah, waxay waayaan tusaalayaal ay ku daydaan oo dhiirrigelin kara. Tani waxay sii xoojisaa fikradaha dhaqanka ah ee sheegaya in waxbarashada iyo shaqooyinka xirfadeed ay raggu leeyihiin. Marka ay gabdhuhu arki waayaan macallimiin dumar ah, waxay inta badan waayaan dhiirrigelinta ay ku sii wadaan waxbarashadooda.

**3. Natiijooyin waxbarasho oo hooseeysa**

ESA (2021) waxay muujisay in dugsiyada ay joogaan macallimiin dumar ah ay ardaydu, gaar ahaan gabdhuhu, gaaraan natiijooyin wanaagsan oo akhris iyo xisaab ah. Macallimiinta dumarka ahi waxay abuuraan jawi waxbarasho oo isdhexgal ah oo taageera dhammaan ardayda. Dhanka kale, la'aanta haweenka fasallada waxay daciifisaa baridda u nugul jinsiga iyo ka qaybgalka gabdhaha.

**4. Farqiga magaalo iyo miyi ee macallimiinta dumarka**

Inta badan macallimiinta dumarka ahi waxay ku urursanyihiin magaalooyinka, halka miyiga iyo deegaannada reer guuraaga ah ay yihiin meelaha ugu yar marka la eego tirada haweenka wax bara. Tani waxay sii fogeyneysaa sinnaan la'aanta helitaanka iyo natiijooyinka waxbarasho ee gobollada kala duwan.

## GUNAANAD

Yaraanta macallimiinta dumarka ah ee Soomaaliya waxaa calaamad iyo sabab u ah sinnaan la'aanta jinsiga ee waxbarashada. Waxaa sababa dhaqamada bulshada ee soo jireenka ah, xaaladaha shaqo ee liita, iyo hoggaanka dugsiyada ee ragga u badan oo saameeya go'aannada shaqaalaynta. Inkastoo JRES (2018), ESA (2021), iyo ESSP (2023–27) ay si joogto ah u aqoonsadeen baahida loo qabo in la kordhiyo ka qaybgalka dumarka ee macallinnimada iyo hoggaanka waxbarashada, balse horumar muuqda wali lama gaarin.

Si loo yareeyo farqigan, Wasaaraddaha Waxbarashada iyo la-hawlgalayaashoodu waa inay hirgeliyaan siyaasado si cad u matala jinsiga, kuwaas oo ay ku jiraan: xaqiijinta habraacyo shaqaalayn oo caddaalad ah, ballaarinta fursadaha tababarka macallimiinta dumarka ah, iyo bixinta dhiirrigelin xirfadeed iyo dhaqaale gaar ahaan haweenka ka shaqeeya meelaha miyiga. Sidoo kale, waa in la xoojiyo hagidda iyo hogaaminta dumarka ee maamulka waxbarashada si loo hubiyo matalaad waarta.

Haddii caqabadahan si nidaamsan loo wajaho, Soomaaliya waxay gaari doontaa horumar muuqda oo dhinaca sinnaanta iyo tayada waxbarashada ah. Shaqaale macallin oo dheellitiran ayaa dardar gelin doontaa iyo gaarsiinta Ujeeddada Horumarka Waara ee SDG 4—taas oo ah xaqiijinta waxbarasho tayo leh oo loo simanyahay qof walba.

**W/Q:** Asmaa Sh. Cabdulqaadir Maxamed

# 27 SANO KADIB:

## PUNTLAND MA U BAAHAN TAHAY DIB-U-HABAYN SIYAASADEED, DHAQAALE, AMNI IYO ARRIMAHA BULSHADA?



Axmed Siciid Nuur



**Xigashada Sawirka**: Facebook

# HORDHAC

Waa maxay dib u qaabayn dowladeed (Government reform)? dib u qaabayn dowladeed waa geedi socod nidaamsan oo lagu horumariyo qaab dhismeedka, shaqada, siyaasadaha iyo waxqabadka hay'adaha dowladda si looga dhigo kuwo shaqada u fuliya sida ugu wanaagsan ugu waxtar badan, ugu daahfuran, isla xisaabtana uu ka muuqdo, si kale haddii loo yiraahdo dib u qaabaynta hay'adaha dowladdu waa isbedel lagu sameeyo sida dowladu u shaqayso ama u hawl gasho sida ay u samayso sharciyada ay ku shaqayaso, ha'yadaha sharciyadaas fuliya, qaabka loo fuliyo iyo shaqaalaha dowladda oo hawlahaas qabanaya oo kartidooda waxqabad kor loo qaado si ay u bixiyaan adeegga dadweynuhu ka sugaayo, cadaaladda u sugaan isla markaasna uga jawaabaan baahiyaha is bed bedelaya ee bulshada.

Hadaba, bal aan eegno waxa culimada ku takhasustay arrimahaan ay ka yiraahdeen inagoo soo xiganayna aragtiyaha culimada reer galbeedka iyo kuwa Islaamka labadaba. Culimada reer galbeedka oo arrimhaan wax ka qoray waxay dhamaantood si mug leh isku raacsan yihiin in dib u qaabaynta dowladnimadu ay tahay geedi socod joogto iyo la qabsi ah (ongoing and adaptive process) ee uusan ahayn dhacdo hal mar la sameeyo isla markaasna faraha laga qaado oo iskeed isu wada.

Dwight Waldo (1948), Wuxuu maamulka dowladda ku macneeyey inuu ku shaqeeyo deegaan isbedel siyaasadeed iyo bulsho ay si joogto ah uga dhacayaan sidaas darteed nidaamka maamulku waa inuu isla bedelaa isaga oo la qabsanaya xaaladaha dhacaya. Sidaas si la mid ah Herbert Simon (1947) wuxuu ku nuux nuuxsanayaa dadka go'aan qadashada leh waxay wajahaaan caqliyad xadidan oo uu ula jeedo inta badan ma qaataan go'aamada ugu wanaagsan oo macquulka ah maxaa yeelay ma raadshaan xog dhamaystiran oo ku saabsan mawduuca ay go'aanka ka qaadanayaan, waqti ku filan ma siiyaan, waxaa dhici karta qofka hogaamiyaha ah inuu keligiis iyo dhowrka qof oo ka agdhow xogta uu ka helo uu ku saleeyo go'aan qaadashadiisa halka talo kasta loo baahan yahay in dadka ehelka u ah lagala tashado waqtina la geliyo si go'aan sax ah loo qaato mararka qaarkoodna la qabto shirar waaweyn oo dad ehel u ahi mawduucaas go'aanka laga qaadanyo ay si cilmi ah ugu falan-qeeyaan talooyin la kala dooran karana ka soo jeediyaan.

Osborne and Gaebler (1992) waxay ku doodeen dowladuhu waa inay dib isu abuuraan, isu cusboonaysiiyaan, si ka duwan qaabkii hore oo ka waxtar badan ay hawlaha u qabtaan si ay uga jawaabaan xaaladaha isbed bedelaya iyagoo xooga saaraya hal-abuurka iyo wax cusub inay soo kordhiyaan iyo sidoo kale inay u furnaadaan isbedelkana la qabsadaan ayna bedeli karaan qorshahooda marka duruuf deg deg ah oo la qabsi u baahan ay soo wajahdo dowladda.

Sida ay qabaan Fred Riggs and Sabatier (1988) dib u qaabaynta siyaasadeed waxay ku timaadaa barasho iyo la qabsi joogto ah (learning and adaptation) jilayaasha siyaasadda dhexdooda, fikradani waxay hoosta ka xariiqaysaa in dib u qaabaynta dowaladu tahay mid si joogto ah isu bedelaysa (dynamic and continous) taasoo ay saamayn ku yeelanayso ama qaabaynayso cashardii laga soo bartay qorshihii horey loogu socday, isbedelka ku dhacaya muhiimaddaha la siinayo arrimaha siyaasadeed, horumarka tiknooloojiyada, aqoonta iyo baahida bulshada oo waqtiga isla bedelaysa.

Hadanna aynu eegno culimada iyo mufakiriinta Islaamka sida Sayyid Qutub, Hassan al-Banna, Muhamed Iqbal, Fazlur Rahmaan Iyo Abdulrahmaan al-Kawakibi oo si qoto dheer mawduucan dib u qaabaynta dowladda wax uga qoray iyo waxay ka yiraahdeen fikrada ku saabsan dib u habaynta dowladnimada (government reform) inagoo eegayna culumadii hore iyo kuwa casriga ah oo hadda jooga (classical versus modern Islamic thought on government reform).

Culimadii hore marka ay ka jawaabayaan maxaa dowlad loogu baahanyahay ama waa maxay hadafka dowlad loo samaysanayo, waxay xooga saarayaan arrimaha ay ka midyihiin fulinta shareecada, xaqiijinta cadaalada, difaaca diinta, nolosha dadka, caqliga hantida iyo sharafta dadka, halka culimada Islaamka mufakiriinta cusubi ay ku darayaan intaas in la gaaro dowlad wanaag, maslaxad, horumar waafaqsan qiyamka Islaamiga ah.

Firkrada Islaamku ka qabo dib u qaabaynta (reform) waa islaaxin ama hagaajin, sixid dareenka iyo hab dhaqanka maamulka oo laga saxayo dhaqanka faasidka ah musuqana ku

salaysan. Sidoo kale culumada Muslimiinta ee waqtigan dib u qaabaynta dowladda waxay ku macneeyaan cusboonaysiin (renewal). Isla xisaabtanka ayey culimada Islaamku qabaan inay tahay muhiim ayna xaqiijiyaan hay'adaha dowladu, dastuurkana ku qeexan tahay si waafaqsan shareecda Islaamka.

Culimada Islaamku waxay xooga saarayaan wada tashiga (consultation) inay ku timaado dib u qaabaynta nidaamka dowaldu, iyo in la qabto doodo furan oo ay ka soo baxaan fikarado horseedaya maslaxo, islaaxin ama hagaajin iyo dib u cusboonaysiin.

Hadaba maamulka Puntland ma u baahanyahay dib u qaabayn (government reform)? dib u qaabayn noocee ah ayaa loo baahan yahay? sidee ku imaan kartaa dib u qaabaynta dowladda Puntland looga jeedo, dhanacyadee bay khusayn kartaa. Qormadaan ayaan ku falanqayn doonaa anigoo isku dayaya inaan ka jawaabo su'aalahaas iyo kuwo kaleba.

Waa maxay arrimaha u baahan in dib loo eego?

Waxaa jira arrimo loo baahanyahay in dib u eegis lagu sameeyo, arrimahaas oo aan isleeyahay in ay ugu muhiimsanyihiin waxaa kamid ah:

- Dastuurka Puntland
- Arrimaha siyaasada
- Dowlad wanaaga (good governance)
- Dhaqaalaha
- Nidaamka cadaalada oo dib loo eego (justice reform)
- Amniga gudaha iyo dibada oo dib loo eego (security reform)
- Arrimaha bulshada

Qormadaan waxaan ku qaadaa dhigi doonaa dib u eegista looga baahanyahay arrimaha dastuurka, siyaayadda iyo dowlad wanaaga, iyo arrimo kale oo ay ka mid yihiin dhaqaalaha, cadaaladda, amniga iyo arrimaha bulshada.

# 1. DIB U EEGISTA DASTUURKA PUNTLAND (CONSTITUTIONAL REVIEW)

Marka ugu horaysa, Puntland waxay u baahantahay inay dib u eegto dastuurkeeda la qoray 2012, muddo hada laga joogo 15-sano, ka horna waxaa jiray axdi qarameedkii lagu dhisay Puntland 1998 oo balantu ahayd muddo laba sano ah in lagu diyaariyo dastuur iyo doorasho qof iyo cod ah hase yeeshee taasi ma hirgelin waxaa dhacay firaaq dastuuri ah oo sababay in khilaaf siyaasadeed ka dhaco Puntland bishii July 2001, kaas oo sababay dagaal sokeeye oo qaatay muddo laba sano ah. Khilaafkaas waxaa laga heshiiyay bartamihii 2003. Dastuur aan la isku raacsnayn oo la diyaariyay xiligii madaxweynihii kowaad ayaa lagu sii dhaqmaaayay ilaa laga gaaray 2012, muddo toban sano ah ayay ku qaadatay Puntland diyaarinta iyo ansixinta dastuurka hadda jira, shaqadiisu waa soo jiitamaysay muddo toban sano ah oo intaas guddiyo ka soo shaqaynayeen hase yeeshee waxaa la dhammaystiray 2012 xilligii madaxweynihii sadexdaad Cabdiraxmaan Maxamed Faroole oo u sameeyay wasaarad gaar ah oo nin sharci yaqaan ah mudane Cabdi Xasan Jimcaale uu hogaaminayay, Jimacaale Ilaahay ha u naxariistee wuxuu ku dulshaqeeyay dastuurkii la qorayey isagoo ka soo saaray midka hadda lagu dhaqmo oo aakhirkii ergo 400 qof ka badan ay cod ku ansixiyeen sanadkii 2012.

Dastuurku wuxuu isla bedelaa waqtiga iyo wacyiga iyo sidoo kale xaaladaha siyaasadeed iyo dhaqan dhaqaale oo si joogto ah isu bed bedelay 16-sano ee la soo dhaafay tusaale ahaan xilligaas Dowladda Federaalka ah oo hadda jirtaa sanad ma jirin, sidoo kale ma jirin dowlad goboleedyo kale, oo xaaladu sida ay maanta tahay waa ay ka duwanayd.

Arrinta kale oo khasbaysa in dastuurka dib loo eego waa hirgelinta barnaamijka qof iyo cod, sida aynu la socono Puntland waxaa ka hirgalay doorashooyinka dowladaha hoose oo dadku qof iyo cod ku soo doorteen, sidoo kale waxaa la furay axsaab ku tartamay doorashooyinka dowaldaha hoose, golayaasha hadda jira iyo xisbiyadaba waqtigoodu wuxuu ku egyahay 2028, iyadoo Janaayo 2029 Puntland ay sugayso

sadex doorasho oo is huwan kuwaas oo kala ah, doorashada dowladaha hoose, baarlamaanka iyo madaxweynaha, qorshuhuna yahay in intaba qof iyo cod lagu doorto.

Hadaba, labada sano ee soo socota waxaa lagama maarmaan ah in la diyaariyo shuruucdii doorashada oo ka bilaabmaysa dastuurka, sharcigii doorashada golayaasha dowladaha hoose iyo baarlamaanka, qaabka loo dooranayo madaxweynaha, ma wuxuu noqonayaa baarlamaani mise toos baa dadweynuhu u soo dooranayaan, sidoo kale shuruucdii lagu maamuli lahaa xisbiyada iyo guddiga doorashada ayaa loo baahanyahay in la dhammaystiro sida ugu dhaqsaha badan. Arrimahaas oo dhami waxay khasbayaan in dastuurka dib oo eego laguna qeexo si cad.

Hadaba, dib u eegista dowladnimada Puntland waa inay ka bilaabmataa dastuurka iyadoo dastuurka dib loo eegayo marka horena geedi socodka iyo habraaca dib u eegista dastuurka in la sameeyaa waa muhiim, tashi dadweyne in la geliyaa waa huhiim, cashardii laga bartay ama qaladaadka aan watiga la socon karin oo la soo maray in wax laga barto waa muhiim, dastuur waqtiga maanta jira la jaanqaadi kara inay Puntland yeelato waa muhiim waana furaha dowladnimada wanaagsan oo aynu la rabno Puntland.

# 2. SIYAASADDA

### 2.1. Dib u eegista wada shaqaynta iyo xiriirka Puntland iyo Dowladda Federaalka

Waxaa muhiim ah in Puntland yeelato siyaasad si mug weyn looga fekeray dhinac kastana laga eegay loo saaray dad khubaro ah oo arrimahaan si cilmiya u daraaseeya isla markaasna jawaab u hela su'aasha ah horta Puntland maxay danteedu ku jirtaa marka laga hadlaayo wada shaqaynta Dowladda Federaalka, sidee ugu haboon oo loo wada shaqayn karaa?, maxaa la isku hayaa?, ma waxaa is haya madaxweynaha madaxtooyada Muqdisho jooga iyo madaxweynaha Puntland jooga mise mabaadii' ayaa la isku hayaa? ma dastuurka qodobadiisa awood qaybsiga ayaa la isku hayaa ? iwm.

Puntland waxay u baahantahay siyaasad ka duwan tii hore oo ay kula dhaqmi jirtay Dowladda Federaalka, sidoo kale uma baahna siyaasad ku salaysan isdhiibis iyo sacab tumis, waxay u baahantahay labaadaas mid aan ahayn oo aad looga fekeray kuna salaysan mabda' ah iska ilaali iskuna ilaali inta wadanka uu ka hirgelayo ku dhaqanka sharcigu dowladnimo buuxda oo la isku hallayn karo isla markaasna laga heshiinaayo qodobada awood qaybsiga iyo khayraadka oo nidaamka federaalka ku salaysan.

Siyaasad ku salaysan inaad fadhiisato miiska danaha Soomaaliyeed lagaga hadlaayo isla markaasna mawqifkaaga dhiibato, siyaasad aad ku kasbanayso saaxiibo aad isku mawqif iyo mabaadii' tihiin, siyaasad ku salaysan xisaabtan iyo danaha Puntland oo albaab kasta loo garaaco, siyaasad qeexan oo qoran qof kastaana laga rabo inuu meesha uga aadan ka soo baxo, siyaasad aan macno tirayn masuuliyiinta ku metala Puntland Dowladda Federaalka balse siinaysa xuquuq iyo awood ay waajibkooda ku gutaan, siyaasad ku salaysan illaalinta danaha Puntland oo kala duwan iyo tan Soomaaliyeed ee aan cid kale lagu raali gelinayn.

### 2.2. Hireglinta barnaamijka qof iyo cod

Sida aan kor ku soo sheegay Puntland waxaa sugaysaa in ugu dambayn uu ka hirgalo isla markaasna la dhammaystiro doorashooyinka qof iyo cod, sadex doorasho oo isa saaran ayaa loo baahanyahay in la qabto 2029, gogol xaar badan oo ay ugu weyn tahay dejinta shuruucdii loo baahnaa ayaa sugaysa, shuruucda waa waxa ugu muhiimsan oo doorashooyinku ku guulaysan karaan ama ku fashilmi karaan. Doorashooyinkii dowadaha hoose cashardii laga bartay waa in dib loo eegaa oo laga doodaa isla markaasna wixii laga bartay mustaqbalka lagu duldhisaa, shuruucda cusub oo la samaynayana lagu daraa.

### 2.3. Maamulka Waqooyi Bari iyo duruufaha ku hareeraysan

Waa mid ka mid ah mushkiladaha siyaasadeed oo sugaya Punland inay xal u hesho, ka dib dhismihii SSC-Khaatumo Febraayo 6, 2023 iyo soo dhoweyntii Madaxweynaha Puntland maamulkaas halkaas oo ay garaadadu kaga dhawaaqeen. Wixii markaas ka dambeeyay Puntland ma aysan soo bandhigin siyaasad cad oo ay ku maaraynayso arrinkaas, waxay qaadatay siyaasad ku salaysan sug oo dhawr dabadeedna ka daba tag wixii halkaas ka soo baxa. Halkaas waxaa ka soo baxay maamul

la magac baxay Waqooyi Bari oo Dowladda Federaalku ka shaqaysay ayna Puntland gacmaha ka laabatay, sida muuqata xalku weli waa wadahadal, kaasoo horay looga baaqsaday oo ahaa fursad ay labada dhinacba lumiyeen, fursdaas weli waa furantahay.

Maamulka SSC-Khaatumo markii dambena la baxay Waqooyi Bari wuxuu aaminsanyahay in aan Puntland waxba isugu harin oo ay kala baxeen halka maamulka Puntland oo Siciid Cabdulaahi Deni hogaaminayo ay weli ku adkaysanayaan in loo bahanyahay in sifo sharci ah loo kala gurto. Hase yeeshee waxaa moodaa in labada dhinacba ujeedkoodu yahay mid xoogga saaraya doorashada 2026 oo aan muhiimad weyn la siinayn arrimaha mustaqablka la xiriira. Is afgaranwaa siyaasadeed ee jira ee danasyiga gaarka ah ku dhisan wuxuu saamayn toos ah hadda ku yeeshay gobolka Sanaag oo noqday hadda meel sadex maamul ku muransan yihiin, Puntland, Waqooyi Bari iyo Somaliland, khatar amni oo weyn baa xalkaas ka soo socota.

Sida muuqata Puntland iyo Somalialnd waa ay isku soo dhowaanayaan waxayna wada galeen heshiis iskaashi amni oo markii ugu horaysay shaaca laga qaaday siyaabo kala duwana ay labadaba maamul ugu kala macneeyeen dadkooda, waxaad moodaa inuu yahay heshiis lagu deg degay oo dowlado shisheeye ay dabada ka riixayeen si laablakac ahna loo galay, waxaa dhici karta inuu abuuro xasiloni daro amni iyo mid siyaasadeed isla markaasn ay sii kala fogaadaan dadka Hartiga ah midnimadooda uu dhaawac weyn u geysto. Waxaa cad oo marag ma doonto ah in madaxdii Puntland iyo tan Waqooyi Bari ay taladoodii siyaasadeed shuraako kula noqdeen Muqdisho iyo Hargeysa iyagoo isku xumaynaya oo mid kastaa xulufo siayaasadeed raadsanayo ujeedkuna waa sidaan kor ku sheeganay doorashada qaranka 2026. Habdhaqankaas siyaasadeed oo danaysiga ku dhisan wuxuu mutaqbalka keeni karaa saamayn taban.

Hadaba waxaa la gudboon madaxda Puntland iyo Waqooyi Bari in ay meel iska dhigaan siyaasadahooda ku dhisan xinka iy xumaanta oo ay ka fekeraan mustaqbalka dadka ehelka ah oo ay madaxda u yihiin isla markaasna dariiqa wadahadalka iyo isqancinta ay doortaan kaas oo ah sida ugu haboon oo ay ku xalin karaan farqiga siyaasadeed ee u dhexeeya isla markaasna ay ku yarayn karaan khataraha amni ee suuratgalka ah inay ka dhex dhacaan dadka walaalaha ah.

## 3. DOWLAD WANAAGA (GOOD GOVERNANCE)

Dowlad wanaag waxaa lagu qeexaa inay tahay waxtarnimada (effective), hufnaan (transparency), isla xisaabtan (accountability), u sinnaan iyo cadaalad (equitable) iyo ka qayb galka maaraynta arrimaha dowladda iyo khayraadka dalka. Maamul wanaaga waxaa lagu tilmaamaa inuu yahay asaaska dimuqraadiyadda, nabada iyo horumarka bulshada.

Qaybaha ugu waaweyn ee maamul wanaaga khuseeya ama saldhiga u ah waa kuwa hoos ku qoran :-

- Ka qaybgelinta (participation): Muwaadiniinta go'aamada khuseeya iyaga ama taabanaya noloshooda, ka qaybgalka bulshada ee arrimaha khuseeya masiirkooda waxay dhistaa dareenka lahaansho ee bulshada iyo sharciyadda (ownership and legitimacy) tusaale ahaan la tashiga dadweynaha (public consultation) doorshooyinka (elections) iyo qabashada kulamo dadweyne (community forums) intuba waa ka qaybgelinta bulshada ee arrimaha khuseeya masiirkooda.
- Ku dhaqanka iyo isku xukunka sharciga: Waa arrin muhiim u ah dowlad wanaaga, sharcigu waa inuu qof kasta qabtaa maaha oo keliya shacabka ee waa in loo simanyahay xitaa madaxda ugu saraysa waa in sharcigu qaban karaa la dacweyn karaa haddii ay sharciga wadanka ku xadgudbaan. Taasna waxaa saldhig u ah garsoor madax banaan oo sharciga keliya u hogaansan si cadaalad ahna u fuliya sharciga iyo hogaamiye wanaagsan oo isagu tusaale wanaagsan (role model) u noqda shacabkiisa.
- Daahfurnaanta go'aan gaadashada (transparency): Geedi socdka go'aan qaadashadu waa inay yihiin kuwa muuqda oo sida qoraxda u cad, daahfuran oo aan qrasoodi ahayn dadkana aan laga qarin go'aamada masiirkooda taabanaya mustaqbalka. Taasi waxay kordhisaa kalsoonida ay dadweynuhu ku qabaan

madaxdooda, tusaale soo bandhigista xisaab celinta dowladda ee miisaniyadda dadweynaha loo soo bandhigo si ay u ogaadaan cashuurtii laga qaaday sida loo maamulay iyo waxa lagu isticmaalay, waxay tusaale u nqoon kartaa daah frnaanta shaqada dowladda.

- Isla xisaabtanka (accountability): Madaxda iyo hay'adaha dowladu waa inay masuul ka noqdaan lagulana xisaabtamaa ficiladooda iyo go'aamadooda, tusaale waa in la abuuraa hab kormeer iyo la socod ku sameeya shaqada madaxda iyo hay'adaha dowladda sida hay'adda la dagaalanka musumaasuqa oo awood u leh inay soo eedayso hay'adii ama masuulkii ku xad gudba shaqadiisa ama musuqmaasuqa hantida dadweynaha iwm.
- Bixinta jawaabo iyo adeeg (responsiveness): Hay'adaha dowladda iyo saraakiisha ka shaqeeyaa waa inay ka jawaabaan baahiyaha bulshada ay masuulka ka yihiin sida iyo waqtiga ugu haboon.

Arrimahaas iyo kuwo kaleba oo aan qormadaan ku soo koobi karin waa ay ka maqan yihiin Puntland, tan iyo intii la dhisay Puntland ma helin dowlad wanaag, waxay ahayd meel qofka madaxweynaha ka noqda taladu keligiis gacanta ugu jirto fikirkiisa iyo qaab siyaasadeedkiisa keliya ku maamula wadanka waana sababta ay dadku ugu bixiyeen magaca madax ka nool oo macneheedu yahay qof keliya ayaa talada haya inta kale maco maleh.

Hadaba Puntland waxaa lagama maarmaan ah inay dib isu eegto isla markaasna horseedo barnaamjika dowlad wanaag ah oo saldhig u noqon kara dimuqraadiyada, nabada iyo horumarka Puntland, madaxweynuhuna uu noqdaa tusaale wanaagsan oo bulshada iyo madaxda isaga ka hoos shaqeysa ay ku daydaan (role model), dowlad wanaagu waa inuu ka muuqdaa isla markaasna ka bilowdaa xafiiska madaxweynaha si inta kalena ay ugu dayato.

La soco cadadka dambe iyo qormo ku saabsan dib u eegista arrimaha dhaqaalaha, cadaaladda, nabadgelyada iyo arrimaha bulshada.

**W/Q:** Axmed Siciid Nuur



# DHIBTU WAA DHANKEE: DANAYN LA'AANTA BULSHADA MISE DAMACA SIYAASIGA?




Aadan Salaad Maxamuud
(Aadan-Badiic)



**Xigashada Sawirka**: The American mind

Ku foogganaanta muwaadiniinta ee xuquuqdooda dabiiciga ah, mudnaansiinta sarraynta sharciga, gudashada waajibaadkooda, iyo iskacaabbinta caddaalad-darrada, tafaraaruqa iyo xeerarka aan qummanayn waxay dammaanad qaadi karaan wiiqidda tiirarka dulmiga iyo dib-udhaca, waxayna dabartaa damaca gurracan ee siyaasiga.

Waxaa jirta tusaalayn caalami ah oo loo tiiriyo David Easton loona yaqaan “Tusaalaha Easton” taasoo komtomeeyadii qarnigii tagay soo shaacbaxday. Tusaalahaasi wuxuu daaran yahay sidii loo fahmi lahaa isdhexgalka iyo iskudhafnaanta hay’adaha dowladeed iyo kuwa bulshada. Si kale haddii loo dhigo; waa sidii doonitaanka bulshadu u jaangoyn laha damaca siyaasiga ama hoggaanka. Waa iskutiirsanaan, marna islaxisaabtan, mar kalena waa mid ka mid ah tusaalayaasha ugu habboon uguna fudud ee sharxaya dabeecadda shaqaynta nidaamka siyaasadeed, tusaalahaani wuxuu ku qotomaa dhab ahaanshaha, in qodobka ugu weyn ee saameeya xasilloonida dowladda uu yahay “bulshada/jamhuurka” kaas oo u roga aragtidiisa dalabyo ka turjumaya baahiyihiisa. Bulshadu keliya ma saamayso go’aannada hoggaamiyaha ama siyaasiga, balse nidaamka siyaasadeed heer qaran iyo mid caalami ah ayay sidoo kale saameeyaan go’aannadeedu.



Shaxda 1aad: Tusaalaha Easton

Dalabyadaasna waxaa la gudbiyaa iyada oo loo marayo xisbiyada siyaasadeed ama hay’adaha bulshada rayidka ah. Kadibna si togan ama taban ayay dowladdu uga jawaabtaa dalabaadkooda iyo baahiyahooda, ka dibna hawshu sidaas ayay kusii socotaa. Sidaa darteed, danayn la’aanta bulshada arrimaha danta guud iyo siyaasadda, waxay horseeddaa inuu fulo doonitaanka siyaasigu.

Siyaasaddu waa isla falgalidda danaynta dadweynaha iyo go’aannada hoggaamiyaha. Waxaa la sheegaa mar kasta oo ay kala fogaadaan masaafada u dhaxaysa bulshada iyo siyaasiga ama hoogaamiyuhu, waa markasta oo uu abuurmo damac siyaasi oo gurracan, kelitalisnimo iyo kutagrifal awoodeed. Sidaa darteed, ayuu qoraagii, iyo faylasuufkii Faransiiska ahaa Étienne de La Boétie (1530-1563) qoraalladiisii caanka ahaa ee uu ugu magac daray [Addoonsiga La Qaayibay] wuxuu isku weydiinayaa: “Maxay dadka u doortaan addoonsiga, iyagoo awood u leh in ay iska caabbiyaan?” Haddii aad rabtaan xorriyad, joojiya inaad adeegtaan; kaligitaliyuhu ma aha xoog, waa hal qof oo ay malaayiin qof oggolaadeen.”

Haddaba, si kor loogu qaado danaynta iyo doonitaanka bulshada ee ku aaddan siyaasadda iyo dowlanimada waa in la helaa wacyi siyaasadeed oo heer qofeed iyo mid bulsheed gaarsiisan. Dr. Qahtan Hussein Al-Lawandi, cilmibaare ka ah Xarunta Mustaqbalka ee Daraasaadka Istaraatiijiyadeed [Future Center for Strategic Studies], wuxuu yiri: Wacyiga siyaasadeed waa garashada qofka iyo fahamkiisa waaqaca siyaasadeed ee bulshadiisa iyo dhaadidda dhibaatooyinka jira iyo awoodaha waxku’oolka ah ee saameyn ku leh go’aan qaadashada heerarka qaran iyo kuwa caalamiga ah.

Danaynta siyaasadeed waa xaalad feejignaan iyo baraarug fikradeed oo uu qofku ku kormeeri karo, kulana socon karo dhacdooyinka iyo saameyntooda. Danaynta siyaasadeed waxay bulshada ka caawisaa sidii ay u waajihi lahayd dhibaatooyinka, u dabri lahayd siyaasiga, isagana ilaalin lahayd hanjabaadaha gudaha iyo dibedda uga imanaya. Danaynta siyaasadeed waxaa lagu cabbiraa in qofku leeyahay: Ka qaybgal siyaasadeed oo firfircoon; aragti dhammaystiran iyo garasho qeexan oo ku saabsan qaab-dhismeedka bulshada, dhaqaalaha, dhaqanka, qaranka iyo guud ahaanba caalamka; dareen masuuliyadeed oo ku dhisan joogtaynta mabaa’dida togan ee wanaagsan sida anshaxa, waddani’nimada iyo bini’aadannimada; rabitaanka isbeddelka joogta ah iyadoo la ilaalinayo qiyamka bulshada.

Danaynta siyaasadeed waxay lagama maarmaan u tahay xaqiijinta horumarka bulsheed, cirib-tirka kelitalisnimada siyaasadeed, oo ka mid ah aafooyinka ugu daran ee ay la nool yihiin dalalka dunida saddexaad. Danaynta siyaasadeed, waxay go'aamisaa doorka dowladda iyo hay'adaheeda ee wax ka qabashada arrimaha hortebinta leh.

Ugu dambayn, aan dib idiin celiyee [Dhibtu Waa Dhankee?] Dhibtu waa danayn la'aanta bulshada, dhibtu waa wacyiga hooseeya ee muwaaddinka, waa danayn la'aantiisa danta guud, waa dayacidda xuquuqdiisa, waa qaayibiddiisa caddaalad-darrada iyo luminta dareenkii lahaanshaha. Waayo, damaca siyaasigu waa abuur; rabitaanka awoodda iyo hoggaamintu waa qayb ka mid ah dabeecadda bani'aadanka. Taasi waa sababta loo sameeyey nidaamyo iyo xeerar lagu xakameeyo awoodda, laguna ilaaliyo danaha guud ee bulshada. Sidaa darteed, siyaasiga damac qaba ma aha dhibtu, dhibtu waa bulshada oo ka fogaata qaabaynta masiirkeeda.

Habka ugu wanaagsan ee looga takhalusi karo kutagrifalka awoodeed iyo damaca waalan ee siyaasiga waa in dadku ogaadaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda. Aragtida dadweynahuna waxay kaalin muuqata ka ciyaartaa qaabeynta siyaasada dowladda. Sidaa darteed, danaynta siyaasadeed waxay aad muhiim ugu tahay in bulshada laga saaro go'doominta, kala-goynta, iyo xakamaynta siyaasiga.

**W/Q:** Aadan Salaad Maxamuud (Aadan-Badiic)

# ISBEDDELKA XALINTA KHILAAFAADKA IYO KORORKA DILALKA PUNTLAND: XAALAD U BAAHAN FARSAMO CUSUB



Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)



Xigashada Sawirka: AI

# HORDHAC

Marka hore, si aan u fahano qeexista iyo macnaha Bulshada reer Puntland waxay muddo dheer ku caan ahayd nabad iyo wada-noolaansho ku dhisan hab-dhaqan xeer-dhaqan leh oo awood u lahaa xallinta khilaafaadka bulshada dhexdeeda. Xilligii hore, marka muran ama dhibaato dhacdo, odayaasha dhaqanka ayaa door muuqda ka ciyaari jiray dejinta xaaladda, iyagoo adeegsan jiray garaadkooda, waayo-aragnimadooda iyo xeer-dhaqameed sugan oo ay bulshada oo dhan wada aaminsantahay.

Dilalku waxay inta badan ahaayeen kuwo shakhsi ah, ku dhisan caro ama muran gaar ah, halka dambiyada abaabulan iyo aanooyinka qabiilka ay aad u yaraan jireen. Xaaladdaasina waxay suurtagelisay in lagu wada noolaado xasillooni bulsho iyo mid nafsadeed.

# ISBEDDELKA CASRIGA IYO BURBURKA NIDAAMKII DHAQANKA

Si kastaba ha ahaatee, sannadihii u dambeeyey waxaa si degdeg ah isu beddelay qaabkii bulshada ee is-maamulka iyo xallinta khilaafaadka. Tiknooloojiyada casriga ah, sida baraha bulshada iyo isgaarsiinta degdega ah, ayaa kaalin weyn ka qaadatay kala daadsanaanta nidaamkii hore ee ab-lagasoogaarka ahaa.

Garniqidii odayaasha dhaqanka ee geedka lagu falanqayn jiray wixii jira oo khilaafaad ah, waxaa beddelay guruubyo WhatsApp ah, halkaas oo ay fikrado iyo eedeymo ka dhiiban karaan cid kasta, iyada oo aan la tixgelinayn waayo-aragnimada ama xushmaddii talo wadaagga ee jirtey. Tani waxay dhalisay jaahwareer iyo kala qaybsanaan, iyadoo taladii dhaqanka ay noqotay mid aan lahayn miisaan iyo mudnaan.

Dhinaca kale, isbedelka dhaqaalaha ayaa sababay in awooddii dhaqaalaha ee odayaasha iyo ganacsatada hodonka ahayd ay gacanta u gasho dhallinyaro aan lahayn waayo-aragnimo siyaasadeed ama bulsho. Dhalinyaradaasi mararka qaar waxay khilaafaadka u rogaan arrimo lagu kasbado sumcad ama taageero bulsho, halkii ay nabad ka dooran lahaayeen.

# DHAQANKII IYO CAQLIGII HORE EE AAN LA CASRIYAYN

In kasta oo isbeddelka tiknooloojiyadeed iyo bulsho uu saameeyay bulshada inteeda kale, haddana odaygu weli waxa uu xaajada ugu jiraa qaabkii hore ee ahaa qoor-dhiibashada iyo guddoon rididda. Wuxuu wali u haystaa in reerkiisu ay aaminsanyihiin karaamadiisa iyo in ducadiisu ay miisaan leedahay.

Hase yeeshee, jiilka cusub iyo habka casriga ah ee is-gaarsiinta ayaa meesha ka saaray halgankii xushmadda iyo talada waayeelka, taas oo dhalisay kala go'naan iyo daciifnimo guud oo ku timid doorkii dhaqanka ee hore.

# KORORKA DILALKA IYO AANOOYINKA CUSUB

Waxaa soo baxay dilal isdaba joog ah oo aan sal lahayn, kuwaas oo u eg tartan ama aargoosi ku dhisan car iyo wir. Rag aan dalka joogin oo ku sugan dibadda ayaa mararka qaar qayb ka noqda kicinta colaadaha, iyagoo u isticmaala baraha bulshada sidii goob dagaal.

Waxaa muuqata in aanooyinka qabiilka ay dib u soo cusboonaadeen, gaar ahaan magaalooyinka sida Galkacyo, halkaas oo dil kasta uu sababo dil kale, iyada oo aan la helin nidaam lagu qanco oo mideeya habka wax loo xalliyo.

# MAXAA SABABAY DUUGOOBIDDA TABIHII HORE EE XALLINTA KHILAAFAADKA?

Tiknoolajiyada iyo kala go'a bulshada ayaa sababtay in baraha bulshada lagu beddelo wadatashigii dhaqanka, iyadoo doodaha iyo xanta qoyska laga dhigay kuwo si fagaare ah loogu falanqeeyo.Sidoo kale, dhaqaalaha ku dhisan tartan iyo sumcad ayaa dhalisay in awoodda dhaqaale ay gasho gacanta jiil dhallinyaro, taas oo keentay in la waayo dadkii waaweynaa ee dhexdhexaadka ahaa oo ahaan jiray laf-dhabarta isku haysa bulshada.

Awooddii odayaasha ayaa daciiftay, maadaama

oday dhaqameedka maanta jira ay weli ka fakarayaan qaabkii hore, halka bulshada inteeda kale uu isbedel ballaaran ku yimid gaar ahaan meelihii talada laga heli jiray. Dhanka kale, dowladdu ma leh awood ciidan iyo sharci fulin sugan oo xakamayn kara falalka dilalka iyo aanooyinka, taas oo sii xoojisay fawdada iyo kala dambayn la'aanta bulshada.

Sidoo kale waxaa jira magangelyada dilayaashu ka helaan maamul kale, tusaale waxaa jira xaalado badan oo dilayaal dambiyo ka gaystay Puntland ay magan iyo gabaad ka heleen maamulada deriska ah sida Galmudug, iyo sidoo kale dilayaal kasoo jeeda Galmudug ay gabaad ka heleen Puntland. Tani waxay keentay in ay sii adkaato in caddaalad la helo, isla markaana ay sii kordhaan aanooyin iyo aargoosiyo joogto ah, maadaama dambiilayaashu helaan meel ay ku dhuuntaan. Labada maamul ee Puntland iyo Galmudug weli ma aysan qaadan siyaasad cad oo mideysan oo ku saabsan soo qabashada iyo is-weydaarsiga eedeysanayaasha, taas oo ah caqabad weyn oo nabadda hortaagan.

## TALOOYIN IYO FARSAMOOYIN LAGU XALLIN KARO XAALADDA

1. Dib u dhis nidaamka dhaqanka

- Waa in la sameeyaa golayaal dhaqameed casri ah oo si rasmi ah ula shaqeeya dowladaha hoose, isla markaana leh awood sharciyeed iyo dhaqaale.

2. Xoojinta doorka dowladda

- Dowladda waa inay hirgelisaa ciidan nabadgelyo gaar ah, oo hubka dhigista ka sameeya magaalooyinka halista ah, laguna dhiirrigeliyo wada shaqeyn ka dhexeysa bulshada iyo booliiska.

3. Dib-u-habeyn nidaamka xeerarka maxalliga ah

- Waa in la isku keenaa xeer dhaqanka iyo sharciga dowliga ah, si loo abuuro nidaam isku dhafan oo ku dhisan caddaalad iyo wadajir.

4. Xaalad degdeg ah (Marshal Law) magaalooyinka khatarta leh

- Magaalooyinka qaar ee dilalka iyo aanooyinka lagu soo noqnoqday waa in lagu soo rogaa xaalad degdeg ah muddo kooban, si loo adkeeyo xasilloonida.
- Waa in la sameeyaa ciidanka xasillinta oo leh dammaanad qaran, kana madax bannaan eedda shakhsiyeed ee dil, maadaama ay yihiin ciidan fulinaya waajibaad qaran.

5. Wacyigelin iyo barnaamijyo bulsho

- Hay'adaha bulshada, culimada iyo warbaahinta waa inay hormuud ka noqdaan olole lagu dhiirrigelinayo nabadda, isla markaana lagu dhaleeceynayo dhaqanka dhiigga iyo aanooyinka.

6. Ka hortag hore

- Kiis kasta oo khilaaf ah waa in la xaliyo ka hor inta uusan dhiig ku daadan, iyadoo odayaasha iyo booliisku si wadajir ah u shaqeeyaan.

7. Mas'uuliyad wadareed

- Qabiil kasta waa in uu qaataa mas'uuliyad guud oo ku saabsan nabadda, kana fogeeya dhallinyarada dhiigga ku kacda.

## GUNAANAD

Isbeddelka ku dhacay qaab-dhaqankii hore ee xallinta khilaafaadka Puntland waa mid aan la iska indho tiri karin. Tiknooloojiyada, dhaqaalaha iyo isbeddelka jiilasha ayaa dhaliyay xaalad cusub oo u baahan farsamo cusub oo isku dhafaysa dhaqanka iyo dowladnimada.

Si loo joojiyo dilalka iyo aanooyinka, waa in la helaa isfahan bulsho oo cusub oo ku dhisan wadajir, caddaalad iyo ixtiraamka waayeelka iyo dowladnimada labadaba. Puntland waxay weli haysataa fursad ay dib ugu dhisto sumcadda nabadda iyo wada noolaanshaha, balse taasi waxay u baahantahay in la qaato tallaabooyin degdeg ah oo dhab ah.

Ugu dambayn; dowlad iyo shacabba waa inaan u dhug lahaanno in xallinta khilaafkaa, yaraynta colaadaha, xasaradaha iyo dilalka bulshada ka dhex dhaca, ay horseed u tahay horumar, koboc dhaqaale, is-qaadasho bulsho iyo xasillooni siyaasadeed oo waarta.

**W/Q:** Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)

# MACALLINKU WAA LAF-DHABARTA HORUMARKA: MA HELAY XUQUUQDII UU MUDNAA?



Cabdiraxmaan Maxamed Saciid (Baashe)




**Xigashada Sawirka**: Wasaaradda Waxbrashada Puntland

# HORDHAC

Macallinku waa laf-dhabarta horumarka bulshada iyo dowladnimada, tiirka ugu muhiimsan ee dhisaya maskaxda iyo mustaqbalka jiilka soo koraya. Waa hage, barbaariye, iyo dhise bulsho, diin iyo dhaqan. Bulsho aan macallin lahayn waa sida jir aan laf-dhabar lahayn, jir aan lafdhabar lahayna inuu istaago marna macquul ma ahan. Sidaa darteed, macallinku waa tiirka ay ku taagantahay aqoonta, garaadka, iyo horumarka bulshada.

Ereyga macallin wuxuu ka soo jeedaa af-Carabi "mu'allim", oo micnihiisu yahay bare, iftiimiyaha wadada lagu socdo si loo gaaro hiigsiga mustaqbalka, kana dhiga dadka kale kuwo garan kara xaqiiqada nolosha. Marka la eego diinteena suuban Qur'aanka kariimka ah wuxuu kor u qaaday darajada dadka aqoonta leh, isagoo leh "Eebbe wuxuu kor u qaadaa darajooyin kuwa rumeeyay Alle iyo kuwa la siiyey cilmiga." (Al-Mujaadilah: 11) sunnada oo ah isha labada ee shareecada Islaamka ayaa lagu sheegay dheeraadka uu leeyahay baruhu, Nabiga (NNKH) wuxuu kumatalay qofka caalimka ah sida dayaxa oo kale isagoo iftiiminaya dhulka halka qofka cilmi la'aanta Alle ku caabuda uu ku tusaaleeyay sida xidigaa intooda kale oo iftiimaya balse iftiinkoodu aanuu soo dhaafayn. Hadalka waxaynu ka qaadan karnaa in macallinku yahay iftiinka bulshada, dhiirigeliyaha jiilka, iyo furaha horumarka.

Dhaqanka Soomaaliyeed wuxuu si gaar ah u sharfay macallinka. Maahmaah Soomaaliyeed ayaa oranaysa: "Nin aan la barin, lama baro," taasoo muujinaysa in aqoonta iyo horumarku ku tiirsanyihiin barayaasha bulshada. Si kastaba ha ahaatee, maanta doorka macallinka waxaa soo food saaray caqabado badan — mushahaar yar, tababar la'aan, iyo faham xaddidan oo ku saabsan qiimaha shaqadiisa.

Dal kasta oo horumaray wuxuu garowsaday in horumarka dhabta ahi uu ka bilowdo maalgelinta macallimiinta. Dalalka sida Finland, Japan, iyo Singapore waxay gaareen heerar sare oo waxbarasho sababtoo ah waxay qiimeeyeen barayaasha, iyagoo siiyay xuquuq, daryeel, iyo tababar joogto ah. Puntland, oo kamid ah deegaanada Soomaaliya, haddii la rabo in la gaaro horumar mustaqbal aqooneed iyo dhaqaale, waa in mudnaanta la siiyaa macallinka oo ah tiirka ugu muhiimsan ee dhismaha bulshada.

# MACALLINKA IYO HORUMARKA BULSHADA

Macallinku waa lafdhabarta nolosha bulshada iyo horumarka qaranka. Waa tiirka ugu muhiimsan ee dhisaya maskaxda, dhaqanka, iyo mustaqbalka jiilka soo koraya. Ummad kasta oo rabta horumar iyo baraare waa in ay qiimeysaa, dhiirrigelisaa, oo ilaalisaa xuquuqda macallinka. Qof kasta oo aqoon, xirfad, ama hoggaan leh wuxuu ka soo bilaabay gacanta macallin. Sidaas darteed, horumarka bulshada waa mid si toos ah ugu xiran heerka iyo tayada waxbarashada, halkaas oo macallinku yahay udub-dhexaadka ugu weyn ee wax dhisa.

Doorka macallinka ma aha oo keliya barid aqooneed, balse waa mid dhaqan, akhlaaq, iyo bulsho. Macallinku waa hage, dhiirrigeliye, iyo dhisaha shakhsiyaadka. Markuu bulshada baro aqoon iyo akhlaaq, wuxuu dhisayaa jiil leh masuuliyad iyo hal-abuur. Taariikhda dunida waxay caddeyneysaa in quruumo badan ay ka baxeen mugdi iyo saboolnimo iyagoo ku tiirsan barbaarinta macallimiintooda. Sida ay sheegtay UNESCO (2023), "Macallimiintu waa halyeeyada qarsoon ee horumarka waara, iyagoo gacan weyn ka geysta yareynta faqriga, horumarinta caafimaadka, iyo kobcinta nabadda." Tani waxay muujineysaa in bulshada aanay horumari karin ilaa laga dhiso macallin tayo leh oo heshay tababar, dhiirrigelin, iyo daryeel.

Diinta Islaamku waxay si weyn u tixgelisaa macallinka iyo baridda cilmiga. Nabiga (NNKH) wuxuu yiri: "Fadliga caalimka marka loo eego caabidka waa sida iftiinka dayaxa oo kale marka loo eego xiddigaha kale." (Xadiis uu weriyay Abu Daud). Qur'aanka Kariimka ahna wuxuu leeyahay: "Eebe wuxuu kor u qaadaa kuwa rumaystay iyo kuwa la siiyay cilmiga darajooyin." (Suurat Al-Mujaadilah: 11). Tani waxay caddeyneysaa in macallinku leeyahay darajo sare oo diini ah, waana sababta bulshada Islaamku u tixgelin jirtay barayaasha sida iftiin bulshada dhexdeeda ah.

Bulsho aqoon leh ayaa ah bulsho dhaqaale ahaan kobocda. Macallimiintu waxay tababaraan awoodda shaqaalaha, hal-abuurka ganacsiga, iyo fahamka maamulka. Sida daraasad ay soo saartay World Bank (2022) tilmaamayso, "Dalalka leh macallimiinta si wanaagsan loo tababaray ayaa GDP-ga dalkooda ku kordha celcelis ahaan 2–3% sanadkii." Tani waxay caddeyneysaa in macallinka la xoojiyo uu yahay maalgashi dhaqaale iyo bulsho.

Si kastaba ha ahaatee, macallimiinta dalal badan, gaar ahaan kuwa soo koraya, waxay la kulmaan caqabado badan sida mushahar hoose, tababar la'aan, agab la'aan, kalsooni bulsho oo xadidan, iyo culaysyo xagga maamulka ah. Caqabadahan waxay hoos u dhigaan tayada waxbarashada, taas oo si toos ah u saamaysa horumarka bulshada. Sidaas darteed, waa lagama maarmaan in la sameeyo siyaasad wax ku ool ah oo lagu xoojinayo macallinka, iyadoo la siinayo xuquuqdooda, dhiirrigelin joogto ah, iyo aqoonsi dhab ah oo ay bulshada ku mutaystaan.

Si loo hubiyo in macallinka uu noqdo laf-dhabarka horumarka, waa in la kordhiyo mushaharka iyo dhiirrigelinta, la siiyo tababar joogto ah, la kobciyo sumcadda iyo sharafta macallinka, isla markaana dowladaha iyo hay'adaha bulshada ay si joogto ah u taageeraan waxbarashada. Maalgashiga ugu qiimaha badan ee dal lagu sameeyo waa maalgashiga lagu sameeyo macallinka, sababtoo ah macallinku waa kan dhalin kara aqoonyahan, dhaqaale-yahan, dhakhtar, injineer, iyo hoggaamiye qaran oo mustaqbalka bulshada anfaca.

## WAAJIBAADKA MACALLINKA

Macallinku waa bu'da nidaamka waxbarasho waajibaadkiisana waxaa kamid ah inuu si hufan u gutto masuuliyadiisa si loo xaqiijiyo heerar waxbarasho oo tayo leh. Sida ku xusan National Education Policy ee Soomaaliya, macallinku waa inuu kaalin muuqata ka qaataa hirgelinta siyaasadaha waxbarashada iyo horumarinta tayada waxbarashada ee dalka (moe.gov.so).

Waajibaadka kale ee saran macallinka waxaa ka mid ah inuu si xirfad leh ugu gudbiyaa ardayda aqoonta manhajka, isagoo isticmaalaya habab waxbarasho casri ah oo la jaanqaadaya baahiyaha ardayda. Waxa uu sidoo kale dhiirrigeliyaa hal-abuurka, fikirka madax-bannaan, iyo ka qayb qaadashada ardayda ee hawlaha fasalka. Waxaa laga rabaa inuu ilaaliyo anshaxa fasalka iyo nidaamka dugsiga, isagoo hubinaya in ardaydu helaan jawi waxbarasho oo hufan.

Macallinku waa inuu si joogto ah u horumariyaa xirfadiisa, isagoo ka qayb qaadanaya tababaro iyo aqoon-is-weydaarsiyo lagu horumarinayo tayadiisa waxbarasho.

La xiriirka waalidiinta iyo bulshada, isagoo ka warbixinaya horumarka ardayda iyo ka qayb qaadashada hawlaha dugsiga waa mid kamida waajibaadka macallinka horyaal, xiriirka macallinka iyo bulshada u dhexeya wuxuu kor u qaadaya tayada waxbarashada waxa uuna u dhowaynayaa ardayda, waalidka iyo macallinkaba xaqiijinta hadafkooda.

Macallinka oo waajibaadkiisa uguta sida ugu wanaagsan waxaa ka dhasha soo saarista jiil waxbarasho fiican leh oo mustaqbal ifaya leh, isla markaana kaalin muuqata ka qaata horumarinta bulshada. Waajibaadkan waxa uu ka tarjumayaa doorka muhiimka ah ee macallinku ku leeyahay kobcinta aqoonta, akhlaaqda, iyo wacyiga ardayda, taasoo ka dhigaysa waxbarashada mid miro dhal ah oo waxtar u leh bulshada.

## XUQUUQDA MACALLINKA

Si uu macallinku u fuliyo waajibaadkiisa si hufan, waa in la siiyo xuquuqdiisa dhammeystiran oo uu mudanyahay. Xuquuqda macallinku waa arrin sal u ah tayada waxbarashada iyo kororka aqoonta bulshada.

Marka hore, macallinku wuxuu xaq u leeyahay in lagu ixtiraamo shaqadiisa iyo kaalintiisa muhiimka ah ee bulshada. Waa in lagu maamuusaa, laguna dhiirrigeliyaa sidii uu sii wadi lahaa dadaalkiisa aqooneed iyo tarbiyeynta ardayda. Ixtiraamkaas wuxuu noqon karaa mid af iyo ficilba ah, iyadoo laga dhowrayo hadal dhaawacaya sumcaddiisa ama sharaftiisa.

Sidoo kale, macallinku wuxuu xaq u leeyahay in uu helo mushahar u qalma shaqadiisa adag, si uu ugu noolaado nolol fiican oo u ogolaan kartaa inuu ka fekero horumar aan welwel dhaqaale ku jirin. Dhaqaale xumo ama daryeel la'aan waxay hoos u dhigtaa dhiirigelinta iyo tayada waxbarashada. Sidaas darteed, dowladaha iyo hay'adaha waxbarashada waa inay si dhab ah u ilaaliyaan xuquuqda dhaqaale ee macallinka.

Intaa waxaa dheer, macallinku wuxuu xaq u leeyahay jawi shaqo oo nabdoon, ammaan ah, islamarkaana taageeraya hal-abuurka iyo horumarka aqooneed. Waa in la siiyo fursado tababar iyo horumar xirfadeed si uu ula socdo isbeddellada casriga ah ee waxbarashada.

Ugu dambayn, macallinku wuxuu xaq u leeyahay in la maqlo codkiisa, lagana qaybgeliyo go'aanada la xiriira waxbarashada iyo siyaasadda aqoonta. Tani waxay keenaysaa in macallinka la qiimeeyo, lana arko inuu yahay halyey bulshada u adeegaya.

## KAALINTA DOWLADDAD EE HORUMARINTA MACALLINKA

Sida aan kusoo xusnay maqaalkeenna qaybihii hore, macallinku waxa uu door muhiim ah ku leeyahay horumarka bulshada iyo dowladnimada, waana isha aqoonta iyo meesha u irmaan bulshada oo ay ka helaan aqoonta. Horumarka qaran kasta wuxuu ku tiirsanyahay heerka aqoon ee macallimiintiisu gaareen, sidaa awgeed, marka la dayaco macallinka, waxaa la dayacay mustaqbalka ummadda. Dowlad kasta oo doonaysa horumar dhab ah waa inay mudnaanta koowaad siisaa tayeynta, daryeelka iyo ilaalinta xuquuqda macallimiinta.

Xaalada maanta macallimiinta Puntland ay ku suganyihiin, waxaa ka muuqata daryeel la'aan aan xil la iska saarayn macalimiinta dhanka nolosha iyo dhinaca siyaasadda iyo taageerada dowladda. Inkastoo ay jiraan dadaallo xaddidan oo la sameeyay, haddana kaalinta dowladda ee dhanka horumarinta macallinka aad bay u hoosaysaa. Macallimiintu waxay la tacaalayaan mushahaar yari, tababar la'aan, iyo xaalado shaqo oo aan dhiirrigelin lahayn. Intaas waxaa sii dheer, dowladda Puntland ayaa bishii August 2024 ku soo rogtay lacag canshuur ah oo si toos ah looga jaro mushaharka macallimiinta, taas oo noqotay culays dhaqaale oo cusub oo niyad-jab ku abuuray macalimiinta iyo goobaha waxbarasho.

Wasaaradda Maaliyada Puntland oo amarkan la wadaagtay dhammaan goobaha waxbarashada ayaa sheegtay inuu dhaqangelayo September isla 2024, iyadoo aan la siin goobaha waxbarasha waqti ku filan oo ay ugu soo fekeraan int iyo qaabka loo bixinayo.

Lacagta canshuurta ah oo lagu soo rogay macallimiinta waxay noqotay arrin dood badan dhalisay, sababtoo ah inta badan macallimiintu waxay qaataan mushahar aad u hooseeya, oo aan ku filnayn baahiyahooda nololeed. Inkasta oo la faray bixinta canshuuutaas, haddana ma jirto wax muuqda oo ay dowladdu ku celiso macallinka, ma jiro caymis caafimaad, guri dowli ah, gunno waxbarasho, tababar iyo xitaa qalab waxbarasho oo casri ah. Taas waxay keentay in macallinku dareemo in dowladda aysan garab taagnayn, balse ay sii kordhisay culayska dhaqaale.

Haddii dowladdu rabto in ay dhisto nidaam waxbarasho oo xooggan, waa in ay fahantaa in macallinka u baahanyahay in la maalgashado, la dhiirrigeliyo, lana ilaaliyo. Lacagta canshuurta waa in aan loo arkin culays lagu kordhiyay macallinka, balse loo arkaa inay tahay fursad lagu dhiso adeegyo uu ka faa'iido. Dowladdu waa inay caddeyso halka ay ku bixi doonto lacagtaas, isla markaana macallimiinta la tuso natiijooyin muuqda sida daryeel caafimaad, fursado tababar, ama gunno sannadle ah oo ka soo noqota lacagta la qaaday.

In la qaado canshuur aan la jaanqaadi karin dakhliga macallinka, waxay dhaawacaysaa xiriirka u dhexeeya dowladda iyo bulshada waxbarashada. Halkii ay dowladda garab u noqon lahayd, waxay noqotay mid culays saarta. Taasi waxay sababi kartaa in macallimiin badani niyad jabaan, tayadii waxbarashada oo awalba liidatay ay hoos u dhacdo. Waa in dowladda Puntland si dhab ah u qiimeysaa xaaladda macallimiinta, ulana timaadaa qorshe cad oo lagu taageerayo koritaanka iyo noloshooda.

Horumarinta macallinka waa in lagu saleeyaa nidaam dowladeed oo waara, kaas oo siinaya mushahar ku filan, tababar joogto ah, iyo taageero maaliyadeed oo muuqata. Cashuurta lagu soo rogay waa in lagu beddelaa nidaam caddaalad ah oo qof kasta lagu cashuuro si waafaqsan dakhliga bilaha ah ee uu helo.

## TAYAYNTA MACALLINKA

Tayaynta macallinka waa tiirka ugu muhiimsan ee lagu dhiso nidaam waxbarasho oo tayo leh. Macallin aan la tayeyn ma soo saaro arday aqoon iyo karti leh, sidaa darteed horumarinta xirfadaha, aqoonta iyo akhlaaqda macallinka waa maalgashi toos ah oo lagu sameeyo mustaqbalka dalka.

Macallinka tayadiisu sarreyso waa mid leh aqoon qoto dheer, faham guud oo ku saabsan dabeecadda ardayga, iyo awood uu ugu gudbiyo casharka si hal-abuur iyo dhiirrigelin leh. Tayada ma ahan mid hal mar la gaari karo, balse waa geeddi-socod joogto ah oo u baahan tababar, dhiirrigelin, iyo taageero joogto ah oo la siiyo macallinka.

Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Puntland waa inay dejisaa barnaamijyo tababar joogto ah oo diiradda saaraya xirfadaha macallinka, sida maamulka fasalka, isticmaalka tiknoolajiyadda waxbarashada, iyo fahamka hababka casriga ah ee waxbarid-cilmiyeedka. Sidoo kale waa muhiim in la abuuro nidaam dhiirrigelin ah oo lagu abaalmariyo macallimiinta muujiyay hufnaan iyo hal-abuur si ay ugu noqoto dhiirigelin.

Tayada macallinka waxay si toos ah u saamaysaa tayada ardayga. Ardaygu wuxuu noqdaa mid xiiseeya waxbarashada marka uu helo macallin dhiirrigeliya, fahamsan, oo wax ku baraya jacayl iyo kalgacal aqooneed. Laakiin haddii macallinka uu la

daalaadhacayo dhibaato dhaqaale ama tababar la'aan, ardaygu ma heli karo hogaamin iyo hanuun sax ah.

Sidaas darteed, tayeynta macallinka waa mas'uuliyad dowladeed oo aan la iska indho tiri karin. Dowladdu waa inay maalgashataa maskaxda macallinka, maadaama uu yahay curiyaha maskaxda ardayda. Marka macallinka la siiyo fursad uu ku kobciyo aqoontiisa, natiijadu waxay noqotaa jiil aqoon iyo karti leh oo hoggaamin kara mustaqbalka Puntland iyo guud ahaan Soomaaliya.

## GABAGABO

Waxbarashadu waa aasaaska horumarka, macallinkuna waa udub-dhexaadka aasaaskaas, Taariikhda iyo dhaqanka Islaamku waxay si cad u muujinayaan muhiimadda baraha, isagoo la siiyay darajo sare oo aqooneed iyo mid bulsho. Qaramada horumaray sida Finland, Japan, iyo Singapore waxay caddeeyeen in maalgashiga macallinka uu toos uga turjumayo koboca dhaqaale, tayada bulshada, iyo mustaqbal ifaya oo waara.

Si kastaba ha ahaatee, xaaladda macallimiinta Puntland iyo Soomaaliya guud ahaan waxay weli la tacaalaysaa caqabado badan sida mushahaar yari, tababar la'aan, agab xaddidan, iyo taageero dowladeed oo liidata. Dhibaatooyinkan waxay si toos ah u saameeyaan tayada waxbarashada iyo horumarka bulshada. Daraasado ay sameeyeen GTEC, UNICEF, World Bank, iyo GPE ayaa muujinaya in tababarrada iyo tayaynta macallinka ay saameyn muuqata ku yeeshaan hufnaanta waxbaridda iyo kobcinta xirfadaha macallimiinta, balse tirada macallimiinta si buuxda u tababaran weli aad bay u yar tahay.


Sidaa darteed, ixtiraamka, ilaalinta xuquuqda, tayaynta xirfadda, dhiirrigelinta, iyo maalgashiga joogtada ah ee macallinka waa lama huraan si loo hubiyo horumar waara. Macallinku wuxuu noqon karaa halyey bulsho iyo furaha dhisidda jiil aqoon leh, hufan, isla markaana ka qayb qaata horumarinta dalka. Ugu daynbayn mustaqbalka aqooneed, dhaqaale, iyo bulsho ee Puntland wuxuu si toos ah ugu xiran yahay sida loo taageero, loo daryeelo, loona horumariyo macallinka.

## TALOOYIN

1. Maalgelinta Macallimiinta: Dowladdu iyo goobaha waxbarasho ee gaarka loo leeyahayba waa inay bixiyaan mushahar ku filan oo la jaanqaadaya baahiyaha nolosha macallinka, si loo dhiirrigeliyo shaqadiisa loona kordhiyo tayada waxbarashada. Lacagta cashuurta ah ee la qaado waa in loo beddelaa nidaam caddaalad ah oo laga faa'iidayo adeegyo muuqda sida tababar, caymis caafimaad, iyo qalab waxbarasho oo casri ah.
2. Tababarka iyo Tayaynta Joogtada ah: Wasaaradda Waxbarashada iyo hay'adaha kale waa inay dejistaan barnaamijyo tababar joogto ah, gaar ahaan maamulka fasalka, isticmaalka tiknoolajiyadda waxbarashada, iyo hababka casriga ah ee waxbaridda. Barnaamijyadani waa inay la jaanqaadaan baahiyaha ardayda iyo horumarka aqooneed ee macallinka.
3. Ixtiraamka iyo Dhiirrigelinta Bulshada: Macallimiinta waa in lagu ixtiraamaa bulshada dhexdeeda, laguna dhiirrigeliyaa doorkooda hagid iyo dhisid bulsho. Ixtiraamkan waa in uu ahaado mid af iyo ficilba ah, isla markaana laga dhowro hadal dhaawacaya sumcadda macallinka.
4. Kaalinta Dowladda: Dowladdu waa inay hubisaa in xuquuqda macallinka la dhowro, codkooda la maqlo, isla markaana laga qaybgeliyo go'aanada waxbarashada. Waxa kale oo muhiim ah in la abuuro nidaam taageero maaliyadeed oo muuqda, kaas oo dhiirrigeliya hal-abuurka iyo xirfadda macallinka.
5. Kobcinta Tirada Macallimiinta Tayeysan: Hay'adaha GPE, UNICEF, iyo World Bank waa in ay xoojiyaan taageeradooda ku aadan macallimiinta si loo helo macallimiin si buuxda u tababaran, loona hubiyo in dugsiyada Puntland ay helaan macallimiin tayo leh oo waxbarashada ka dhigaya mid miro dhal ah.
6. Iskaashiga Hay'adaha Caalamiga ah iyo Dowlada: Hay'adaha caalamiga ah waa inay sii wadaan taageerada tababarka iyo tayaynta macallimiinta, iyadoo si cad loo qeexayo ujeeddooyinka, natiijooyinka la filayo, iyo qiimeynta saameynta waxbarashada.

**W/Q:** Cabdiraxmaan Maxamed Saciid (Baashe)

# PUNTLAND IYO XISBIYADA SIYAASADDA: DIMUQRAADIYAD AAN DAACAD LOO AHAYN



Dr. Maxamed Cali Faarax



**Xigashada Sawirka**: Dookh Press

# HORDHAC

Puntland waxaa la asaasay 1998-dii, mabda' ahaan waxay qaadatay nidaam dimuqraaddi ah oo xukunku baahsan yahay, shacabkuna awoodda leeyahay, sida ku cad (Axdiga Dowladda Puntland: 1998). Waxaa sidoo kale (Dastuurka Puntland: 2009) lagu qoray in awoodda oo dhan Eebbe ka sokow ay dadweynuhu leeyihiin, ayna u idmanayaan masuuliin ay u xilsaartaan si sharciga waafaqsan. Dastuurka Puntland wuxuu qeexayaa in nidaamka siyaasadeed ee dalku ku salaysnaado hannnaanka xisbiyada badan, taas oo ah astaanta ugu muhiimsan ee dimuqraadiyadda casriga ah.

Si kastaba ha ahaatee, inkastoo Puntland ay mabda' ahaan u aqoonsatay dimuqraadiyadda ku dhisan xisbiyada badan tiir asaasi ah, haddana hirgelinta iyo fulinta hannaankan ayaa u muuqday mid aysan daacad ka ahayn hirgelintiisa madaxdii xukunka isaga dambaysay; iyadoo bulshada Puntland iyo aqoonyahankuba marar badan muujiyeen saluug iyo kalsooni darro ku aaddan sida xukuumaduhu u fulinayaan ballanqaadyada qof iyo cod ee lagu sheegay dastuurka, xeerarka iyo hab-raacyada doorashooyinka (Musse: 2024).

Maqaalkan waxaan diiradda ku saarayaa hannaanka xisbiyada badan ee Puntland, anigoo iftiiminaya horumarka laga gaaray, caqabadaha ku horgudban iyo tallaabooyinka mudan in la qaado si loo xaqiijiyo nidaamka xisbiyada badan ee dastuuriga ah.

# WAA MAXAY XISBI SIYAASADEED?

Xisbiga siyaasadeed ee ay Soomaalidu aad u taqaan, kuna dhaqanto waa xisbiga qabiilka, isaga ayay Soomaalidu u adeegsataa inay ku difaacdo deegaankeeda, ku bixiso diyooyinka iyo dakharrada qabiilka lagu leeyahay, islamarkaasna ka dhigataa dariiqa ay ku gaarto siyaasadda iyo xukunka ay rabto inay hanato.

Balse, macnaha xisbiga siyaasaddu waa uu ka duwanyahay sida ay Soomaalidu u taqaan ama ugu dhaqanto. Urur ama xisbi siyaasi ahi waa "Koox dad ah oo leh aragti siyaasadeed, doonayana inay awoodda la wareegaan iyagoo u maraya hannaan doorasho oo dimuqraadi ah" (Antony Downs: 1957).

Inkastoo culimada siyaasaddu ay waxoogaa ku kala duwan yihiin qeexidda xisbi siyaasi ah; haddana waxay isku raacsan yihiin in xisbi siyaasiga ahi yahay:

1. Koox dad ah oo leh aragti siyaasadeed; taasoo meesha ka saaraysa koox dad ah oo ku bahoobay isir, ganacsi, xirfad ama dan gaar ah.
2. Ujeeddada xisbiga siyaasiga loo asaasay waa inay tahay in lagu gaaro xukunka iyo awoodda ugu sarraysa dalka.
3. In xukunka lagu gaaro doorasho dimuqraadi ah, taasoo meesha ka saaraysa awood xoog, jajuub iyo isdabamarin lagu gaaro.

Haddaba, waxaa iswaydiin mudan qaabka loo asaasay xisbiyada siyaasadda Puntland, ma waafaqsanyihiin qaabka xisbiyadu u dhismaan dunida kale, taasoo ah in xisbigu leeyahay aragti siyaasadeed (Ideology) uu ka duulayo, dadaalna ugu jiro inuu xukunka hanto isagoo u maraya hannaan doorasho xalaal ah oo dimuqraadi ah.

Xisbigu si uu noqdo xisbi siyaasi ah, waa inuu u dhisanyahay qaab dimuqraadi ah, golayaashiisa loo doorto si xor ah oo xalaal ah, xooggana uu saaro inuu abuuro bulsho leh wacyi siyaasi ah oo garanaysa xuquuqdeeda, dowladda talada haysana la xisaabtami karta, laakiin xaqiiqadu sidaas way ka duwantahay, xisbiyada Puntland ka jira, iyadoo aysan jirin golayaal xisbi oo si dimuqraadi ah isku doorta, bal intooda badani waa xisbiyo qof shakhsi ahi uu leeyahay amaba qabiil salka ku haya, wax siyaasad ah oo uu ka shaqeeyaana aysan jirin.

# SHAQADA XISBIYADA SIYAASADEED

Xisbiyada siyaasaddu waxay ka shaqeeyaan siyaasad. taasoo ah maaraynta nolosha bulshada, shaqooyinka ay qabtaanna waxaa ugu muhiimsan:

1. Xisbiyadu waxay qaabeeyaan iskuna aaddiyaan danaha bulshada ee kala duwan, waxayna caddeeyaan cod dheerna ku sheegaan filashada dadweynaha iyo baahiyaha ay qabaan si ay dowladdu wax uga qabato.
2. Waxay xushaan shakhsiyaad siyaasi ah oo ay u diyaariyaan inay noqdaan siyaasiyiinta mustaqbalka, kuwaasoo ku tartami doona magaca xisbiga si ay u gaaraan jagooyinka sarsare ee dowladda.
3. Waxay diyaariyaan barnaamij siyaasi ah oo lagu qodobeeyey baahiyaha iyo danaha kala duwan ee bulshada, loona baddalayo mashruuc siyaasi ah oo xisbigu uu ku galo

ololaha doorashada si uu helo codka iyo kalsoonida dadweynaha looguna doorto hoggaaminta dalka.

4. Waxay abuuraan bulsho leh wacyi siyaasi ah oo ka qayb qaadata doorashooyinka, islamarkaasna waxay xoojiyaan xiriirka u dhexeeya muwaadiniinta iyo nidaamka siyaasiga ah ee jira.

5. Waxay ka qayb qaataan sharciyadda nidaamka siyaasiga ah, iyagoo xoojinaya isku xirka muwaadiniinta, ururrada bulshada iyo nidaamka siyaasiga ah ee talada haya.

## MAXAA HORUMAR OO LA GAARAY NIDAAMKA XISBIYADA PUNTLAND?

Inkastoo ay jiraan xisbiyo magac ahaan u dhisan, laguna magacaabo xisbiyo siyaasadeed, waxaan oran karnaa wax uun horumar ayaa la gaaray oo ay ka mid tahay:

1. Doorashooyinka Degmooyinka (2021-2024): Puntland waxay gaartay guul kadib markii ay qabatay doorashooyin dimuqraadi ah markii ugu horreysey tan iyo sanadkii 1969-kii, taasoo ka dhacday 36 degmo oo ka mid ah 50-ka degmo ee Puntland ka koobantahay sanadihii 2021, 2023 iyo 2024-kii. Doorashooyinkaas xooggoodu waxay u abaabulnaayeen qaab qabiil, taasoo meesha ka saartay xisbiyo aragti siyaasadeed ka duulaya oo saaxada soo gala, iyadoo aad mooddo in qolada talada haysaa ay sidaas u rabaan in wax u socdaan, wax u eg filim la jilayo oo aan xaqiiqo ahayn (fiction).

2. Guddiga Doorashooyinka (TPEC III): Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni wuxuu dib u hawlgeliyay Guddiga Doorashooyinka, taas oo suurto gelisay in dib-u-eegis lagu sameeyo dhammaan shuruucda iyo habraacyada doorashooyinka si ay ula jaanqaadaan doorashooyinka golayaasha deegaanka. Inkastoo sharciyo doorashooyin iyo habraacyo la sameeyey, haddana waxaa xaqiiqo ah oo la wada ogyahay in shuruucda qaarkood waxka-beddel lagu sameeyey markii ay doorashadu dhacday kadib, taasoo dhaawac ku ah hufnaanta doorashada.

3. Doorka Haweenka: Inkastoo caqabado jiraan, haddana waxaa dadaal badan lagu bixiyay in haweenku kaalin muuqata ku yeeshaan doorashooyinka golayaasha deegaanka, waxaana lasoo saaray hab-raac qeexaya qoondo go’an oo ay haweenku ku yeelanayaan xubnaha golayaasha deegaanka taasoo ah 30%, balse waxaa marwalba muuqanayay caqabado ku hor-gudban in haweenku ay helaan qoondada loo asteeyey.

4. Ka qaybgalka bulshada la hayb-sooco: Cilmi-baarisyadu waxay muujinayaan in dadka barakacayaasha ah iyo bulshooyinka laga tirada badanyahay ay heleen fursado kooban oo ay ku galaan nidaamka siyaasadeed, taas oo qayb ka ah dadaallada lagu ballaarinayo ka-qaybgalka (GJHSS, 2022).

Horumaradan, in kastoo doorashooyin la qabtay, golayaal deegaanna la doortay, haddana waxay ahaayeen kuwo xaddidan oo aan ku filnayn in lagu abuuro kalsooni ballaaran oo bulshada dhexdeeda ah.

## CAQABADAHA DOORASHOOYINKA GOLAYAASHA DEEGAANKA

### A. Caqabado sharci

Si ay doorashadu si caddaalad ah oo hufan ugu dhacdo, waa in la diyaariyaa dhammaan shuruucda doorashada ka hor intaan waqtigeeda la gaarin, wixii u baahan dib-u-eegis la dhammaystiraa waqtiga ku habboon, si daneeyayaasha kala duwani ugu kalsoonaadaan doorashada, loogana fogaado hubanti la’aan iyo muran inuu ka dhasho qabashada doorashada. Doorashada goleyaasha deegaanka Puntland waxaa ka muuqanayay daldaloolooyin sharci oo ay ka mid yihiin:

- Shuruuc muhiim ah oo la beddelay doorashooyinkii kadib, taasoo dhaawac ku ah hufnaanta doorashada iyo kalsoonida bulshada, gaar ahaan Sharciga Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka oo wax ka beddel lagu sameeyey markii doorashada golayaasha deegaanku dhacday 2 bilood kadib.

- Dastuurka oo ah sharciga ugu sarreeya dalka waxaa lagu sameeyey wax ka bedel 25-kii bisha Luuliyo 2023, waana doorashadii goleyaasha deegaanku markay dhacday 2-bilood kadib, waxaana ka dhashay wax ka beddelkaas khilaaf siyaasadeed oo sababay dhimasho, dhaawacyo iyo khasaaro baaxad leh oo soo gaaray magaalada caasimadda ah ee Garoowe.

B. **Maamulka dodorashada**

Guddiga TPEC oo markii dambena noqday "PEC", waa hay'adda loo igmaday inay maamusho doorashooyinka dalka heerarkooda kala duwan, xisbiyada ayaa xubno ku leh guddiga, balse aqlabiyadda waxaa soo magacaaba Baarlamaanka iyo Madaxweynaha, taasoo wiiqaysa kalsoonida lagu qabo sida ay u qaban karaan doorasho caddaalad ku dhacda.

**C. Dhaqan Qabiil**

Xisbiyada ayaa noqday kuwo loo tiiriyo qabiil ama shakhsiga hoggaamiyaa leeyahay halkii ay ahaan lahaayeen xisbiyo siyaasadeed oo ay bulshadu leedahay. Siyaasadda Puntland ayaa sidoo kale inta badan ku tiirsan abaabul beeleed halkii ay ku tiirsanaan lahayd tartan siyaasadeed.

**D. Ka-qaybgalka Bulshada**

Haweenka, dhalinyarada, iyo dadka laga tirada badanyahay ayaan helin fursad loo simanyahay oo ay ku tartami karaan. Sidoo kale, bulshada ayaa weli u abaabulan qaab qabiilaysan, halkii ay rabitaankooda iyo doorashadooda ku qiimayn lahaayeen barnaamij siyaasadeed xisbi ku ololaynayo.

**F. Talo-soojeedin**

Si Puntland uga gudubto caqabadaha aan kor ku tilmaamay, loona xaqiijiyo nidaamka xisbiyada badan ee dastuuriga ah, waxaa muhiim ah in la qaado tallaabooyin waara oo cad cad:

1. Madax-bannaanida Guddiga Doorashooyinka

- In xubnaha guddiga lagu soo xulo si hufan, kana madax-bannaan saameynta xukuumad, baarlamaanka iyo qabiilkaba.

2. Dhamaystirka iyo Ilaalinta Shuruucda

- In sharuucda doorashooyinka la qabyo tiro, isbeddelkii dastuurka lagu sameeyeyna dib looga noqdo, iyadoo talada laga qaybgelinayo dhammaan daneeyayaasha kala duwan ee bulshada.

3. Dhismaha Xisbiyo Siyaasadeed oo Dhab Ah

- In xisbiyada loo dejiyo shuruudo adag oo ay ka mid tahay: inay yeeshaan aragti iyo mabda' siyaasadeed, barnaamij siyaasi oo qoran, iyo hoggaan lagu doorto hab dimuqraadi ah.
- In hannaanka xisbiyada dib loo furo, loona oggolaado siyaasiyiinta iyo haldoorku bulshadu inay qayb ka noqdaan geeddi-socodka dimuqraadiyadda Puntland oo hadda u muuqda mid afduuban oo aan loo sinnayn.

4. Xoojinta Ka-qaybgalka Haweenka, Dhalinyarada iyo Bulshooyinka La Hayb-sooco

- In qoondada haweenka lagu dhaqmo si dhab ah, lana abuuro fursado siman oo dhammaan bulshooyinka ay kaga qaybgali karaan doorashooyinka.

5. Wacyigelin iyo Waxbarasho Siyaasadeed

- In bulshada lagu baraarujiyo xuquuqdooda siyaasadeed iyo muhiimadda ka qaybgalka codbixinta, si ay u noqdaan dad doorta oo la xisaabtama hoggaankooda.

6. Ka Guurista Siyaasadda Qabiilka Loona Gudbo Siyaasad Qaran

- In la abuuro hannaan siyaasadeed oo qabiilka ka madax-bannaan, kuna salaysan danaha guud ee bulshada iyo horumarinta dowladnimada.

# GUNAANAD

Doorashooyinkii dhacay iyo horumarka la gaaray waxay caddeeyeen in shacabka Puntland diyaar u yihiin dimuqraadiyad dhab ah. Si kastaba ha ahaatee, caqabadaha sharci, dhaqan, iyo siyaasadeed ayaa wiiqaya kalsoonida bulshada.

Dimuqraadiyaddu ma aha eray ku qoran dastuur, balse waa hab-dhaqan horseeda maamul-wanaag iyo horumar bulsho. Haddii Puntland ay rabto inay noqoto tusaale wanaagsan oo dimuqraadiyadeed oo ka hanaqaada Soomaaliya inteeda kale, waa inay si dhab ah u qaaddaa tallaabooyin dhaxalgal ah oo lagu dhisayo nidaam xisbiyo badan oo dimuqraadi ah, shacabku kalsooni ku qabo, madaxda dalka hoggaamisaana ay daacad ka tahay.

**W/Q:** Dr. Maxamed Cali Faarax

Email: drmaxamed.cali.farah@gmail.com

# SALAQLAYNTA SIYAASADDA SOOMAALIYA:

## "SALDHIGASHO LA'AAN IYO SAMATA-BIXIN LA'AAN"



Cabdiraxmaan Shiikhdoon



Xigashada Sawirka: Villa Somalia

Deganaasho la'aanta siyaasadda Soomaaliya waa arrin muddo dheer soo jirtay, haddana salaqlaynta iyo cakirnaanta siyaasaddu waxa ay cirka isku shareertaa marka uu soo dhowaado kalka doorashadu. Hindisaha madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud ee hanaanka doorashada sannadka 2026-da oo ah in dalka laga qabto doorasho qof iyo cod ah, ayaa mucaaradku u arkay in ay tahay dib u doorashada Xasan Shiikh ee mar kale. Tani waxa ay u muuqataa  eray Museveni uu ku galay olohiisii doorashada ee sannadkii 2010-kii, kaas oo  ahaa, "You need another rap" – Mar kale may rabtaan- oo dadkii isku soo baxay ay ku warceliyeen:" Yes Sevo". "Haa Mudde", taas oo markii dambe noqotay heesta ololaha doorashada ee Musavini oo ka dhigan" Birmade Xasan Shiikh". Hindisaha doorashadu waxa uu abuuray jawi cakiran oo ka jira guud ahaan Soomaaliya, gaar ahaan magaalada Muqdisho. Wadahadalo dhowr jeer dhexmaray mucaaradka iyo madaxweynaha ayaan miro-dhal yeelan, marka laga reebo in ay qaar mucaadka ka mid ah ay isku soo dhowaadeen madaxweynaha. Dhinaca kale, heshiiskii dhowaan ay wada saxiideen Somaliland iyo Puntland, ayaa dhaliyey hadalheyn siyaasadeed, oo siyaabo kala duwan looga falceliyey. Khilaafka Jubaland iyo Dowladda Federaalka ayaa yeeshay weji cusub  oo sii cakiraysa is-fahanka Dowladda Federaalka ah iyo maamulka Jubaland. Salaqlaynta siyaasadda Soomaaliya ee ku astaysan saldhigasho la'aanta iyo samata-bixin la'aanta, ayuu qoraalku si kooban u qaadaadhigayaa.

## DEGANAANSHO LA'AANTA SIYAASADDA

Deganaansho la'aanta siyaasadda Soomaaliya waa mid la saanqaaday curashadii dowlad-dhiska Soomaaliya. Ururkii SYL ee taariikhda Soomaalida kaga qoran baal dahab, inta uusan hanan xoriyada, waxaa soo kala dhexgalay tafaraaruq uu sabab u ahaa xasaasiyada qabyaalada iyo hardanka awoodda. Sida uu qoray Trunji(Somalia: The Untold History), golihii SYC, waxaa ku gacan sayray qaar ka mid ahaa horseedkii golaha. 1959-kii, waxaa dhismay Xisbigii Soomaali Wayn (Great Somali league) oo ka jabay xisbigii SYL. Mustafa Fayruus (Cilmi-baaris ku saabsanayd, Eegmada Ceebaha Bidhaanta Siyaasadeed ee Soomaaliya ee 1960-1969), waxa uu tilmaamay in siyaasadda qabiilaysan ee ka dhexjirtay xisbiyada gudahooda iyo xildhibaano danaystayaal ah, ay ka mid ahaayeen waxyaabiihii ragaadiyey waxtarnimada xisbiyadii siyaasadda ee xilligaas jiray. Sidoo kale, 1961, waxaa Soomaaliya ka dhacay inqilaab guuldaraystay oo ay sameeyeen dad ka soo jeeday waqooyiga Soomaaliya oo tabasho siyaasadeed ka qabay saami-qaybsiga sayaasadda Soomaaliya. Dowladii Kacaanka ayaa 5-tii sanno ee ugu horaysay la kulantay deganaan siyaasadeed iyo jihayn bulsho. Dillkii culumada ee Janaayo (January) 1975, ayaa noqonaya qalalaasihii ugu horeeyey ee si weyn ula kulanto dowladu. Dagaalkii Soomaaliya iyo Itoobiya ee sannadkii 1977-dii iyo inqilaabka dhicisoobay ee Abriil (April) 1978-dii, ayaa sababay inay abuuranto jabhadii (SSF/SSDF) ugu horeysay oo hubaysan oo mucaarad ah oo dagaal kala hortimaada dowlada. Sidoo kale, waxaa dhashay jabhado kale oo hubaysan oo dagaal kharaar la galay dowladii Soomaaliya, ilaa ay dowladii ka dhacday Janaayo (January) 1991.

Xilligii ay burburtay dowaldii dhexe ee Soomaaliya, ayey gun iyo caar la baxday deganaansho la'aanta siyaasadda Soomaaliya. Markii hore, waxa dalka ka hanaqaaday jabhado beeleedyo hubaysan oo dagaalo ba'an dalka ka riday sida Muqdisho, Kismaayo, Baydhabo, Beled-Xaawo iyo Gaalkacyo. Shirkii Jabuuti ee 1991-dii oo ahaa isku-daygii ugu horeeyey ee dib-u-dhiska Soomaaliya, ayaa sababay, in ay kala qayb-samaan jabhadihii dalka ka jiray oo ay u kala jabaan labo garab. Ururka USC ayaa u kala jabay labo garab (Garabka Caydiid iyo Grabka Cali Mahdi). Arrintaasi waxa ay abuurtay laba is-bahaysi oo ku hardama talada dalka oo kala ahaa:(i) SNA (Somali National Alliance) oo uu guddoomiye ka ahaa Caydiid iyo SSA (Somali Salvation Alliance) oo hogaaminayey Cali Mahdi. Ururkii SSDF, ayaa sannadkii 1994-tii u kala qaybsamay labo garab (Garabka Yuusuf iyo garabka Maxamed Abshir), kuwaas oo ku kala biiray labada isbahaysi. Sidoo kale hogaamiyeyaashii kooxaha kale ayaa, iyana la kala saftay labada dhinac. Bilowgii shirkii Carta, waxaa soo baxay is-bahaysi ka soo horjeeda shirka Carta iyo dowladii lagu soo dhisay. Is-bahaysigaas waxaa hogaaminayey Cabdulaahi Yusuf, waxaana ka mid ahaa Janaraal Gebiyow, Maxamed Dheere, Buraale, Shaati Gaduud, Adan Madoobe iyo kuwo kale.  Hogaamiyeyaasha hubaynaa ee ka jiray Muqdisho ayaa ka hor yimi dowladii lagu soo dhisay, dalka Kenya sannadkii 2004-ta. Hase

yeeshee, dagaalkii maxaakiimta iyo hogaamiyo kooxeedyadii hubaysnaa ayaa furay waji cusub, kaas oo meesha ka saaray awooddii hogaamiye kooxeedyada, waxaana abuurmay awood mideysan ee maxkamdaha, taas oo ay ka soo hoos baxday kooxda Al-Shabaab oo ilaa iyo maanta dagaal hubeysan kala soo horjeeda dowalada Soomaaliya.

In kasta oo ay jiraan qodobo badan oo ay ka qayb qaatay deganaansho la'aanta siyaasadda Soomaaliya, sida burburkii dowladii dhexe ee Soomaaliya iyo dagaaladii sokeeye, kala qoqobka laga dhaxlay gumaysiga, maamul xumo iyo kuwo kale, haddana, waxaa jira dhowr arrimood oo horseed u ah salaqlaynta siyaasadda Soomaaliya, sida hardanka awoodda, salaafta siyaasiga, danaha shisheeye oo is diidan, musuqa, siyaasadda qabyaaladaysan, iyo weerarada argagixisada oo iyagu soo kordhay 20-kii sanno ee ugu dambaysay. Dhowaan qoraal ay soo saartay hay'adda ICG (24/09/2025), waxa ay cinwaan uga dhigtay:" Bandhiga Doorashada: Ka Hortaga Wareeg Kale oo Siyaasadeed oo Cakiran". Qoraalka ayaa tilmaamay in ay Soomaaliya u socoto jaahwareer siyaasadeed oo hor leh, kaas oo ka dhashay mucaaradka oo ka soo horjeestay hindisaha doorashada ee Madaxweyne Xasan ee sannadka 2026-da, iyagoo ku tilmaamay in hindisahaasi uu yahay" Mar kale dooro Xasan Shiikh". Warbixintu waxa ay tilmaantay in ay siyaasadda cakiran ay horseedi karto rabshado, haddii aan xal laga gaarin hanaanka doorashada, iyo arrimaha dastuurka. Maalinta ay warbixintanu soo baxday, waxaa ka dhacay magaalada Muqdisho, rabshado uu ku naf waayey mid ka mid ahaa ilaalada mucaarada. Ilaa iyo hadda waxaa tagaaan goodiga iyo hanjabaadaha ka dhashay mudaharaadka uu mucaaradku qorshaynayo. Qaar ka mid ahaa golihii mucaaradka iyo Xasan oo heshiiyey. Dhinaca kale, waxa golaha ku soo biiray madaxdaxda jubaland iyo Puntland. Qoraal ay soo saartay wasaaradda iskaashiga dhaqaalaha iyo horumarinta (2022) ee Jarmalka, waxaa lagu sheegay in dadaalka dowlad-dhiska Soomaaliya uu ragaadiyey hardanka awoodda, musuqa iyo weerararada argagixisada. Doorashadii kal hore, waxa jirtay is-maandhaaf la mid ah kan hadda taagan, kaasoo keenay in ay doorashada dib u dhac ku yihimaado (15 bilood) iyo iska-horimaadyo hubaysan oo Muqdisho ka dhacay. Waxaase, nasiib daro ah in aan wax laga baran.

Salaafta (fudeydka) siyaasiga waxa muujinaya go'aamadii uu madaxweyn Xasan ka qaatay khilaafka Jubaland, kadib markii uu ka baxay madasha wadatashiga. Ugu horeyntii maxkamada gobolka Banaadir (25/09/2024) ayaa bixisay amar lagu soo qabanayo Axmed Madoobe. Arrintaas waxaa xigtay in ciidamo laga dejiyo Raas-Kaanbooni (12/12/2024), taas oo keentay dagaal magac xumo u soo jiiday dowlada Soomaaliya. Madaxweyne Xasan ayaa 5 Oktoobar 2025, ka degay magaalada Kismaayo, hase yeeshee boqashadaasi waxa ay ahayd mid lagu guul daraystay. Dad badan oo ka faallooda siyaasadda Soomaaliya, ayaa ku tilmaamay safarka madaxweynuhu in uu ahaa mid aan horey loogu gogol xaarin. Maanta Dowlada Federaalka, waxa ay wadaa talaabo kale oo qar-iska-xoornimo ah, taas oo ah in maamul kale oo Jubaland laga dhiso Gabahaaray. "Taladii ba'dow sow tallo kuuma dhalato". Guul-daradii shirkii Kismaayo, Xasan Shiikh waxa uu safar ku tegay magaalada Adis-Ababa (15/10/2025), taas oo uga gol-lahaa in uu ka faa'iideysto awoodda ay Itoobiya ku leedahay Jubaland, sida uu Axmed Jibriil (Falanqeeye Siyaasada Geeska Afrika) u sheegay Al-Cayn Al-Ikhbaariyah (https://al-ain.com/article/somalia-ethiopia-visit.). Waxa uu intaas ku daray in Adis-Ababa ay mar kasta raad ku yeelan karto rogrogista wada-hadallada Dowladda Feraderaalka iyo maamulka Jubaland, taasoo muhiim u ah marxalada ay hadda Soomaaliya marayso, marka la eego xiriirka ay Itoobiya la leedahay waayeelka siyaasadda, iyo kooxaha amniga. Sidoo kale, Al-Cayn waxa ay sheegtay, in sirdoonka Itoobiya iyo Kenya ay garwadeen ka ahaayeen in la furo wada-hadalada Dowlada Federaalka iyo maamulka Jubaland. Itoobiya iyo Kenya, waxa ay labaduba Jubaland ka leeyihiin arrimo ay ugu horeyso in ay nabadgalyadooda ka ilaashadaan gudaha Soomaaliya.

Dhinaca kale, waxaa jira warar sheega in dowlada Imaaraadku ay Axmed Madoobe ku cadaadisay in uusan keligiis la heshiin Dowlada Federaalka ah. Arrintaas, waxaa xoojinaya qoraal sheegaya in ay dowlada Imaaradku doonaysay in ay u kala dabqaado Dowlada Federalka iyo Jubaland iyo Puntland. Waxa jiray qorshe ah in madaxweyne Xasan Shiikh uu tago dalka Imaaraadka, ka dib shirkii dalalka Carabta iyo dunida Muslimka (heartofafrica.info), taas oo aan dhicin. Arrimahaasi waxa ay muujinayaan sida ay salaqlaynta siyaasada uga qayb-qaateen danaha is diidan ee dalalka shisheeye iyo salaafta

siyaasiga. Dhinaca kale hardenka iyo marooqsiga awooddaha dowlada ayaa ka mid ah waxyaabaha sababay cakiranaanta siyaasadda Soomaaliya. Prof. Kaynaan, ayaa sheegay in madaxweynuhu uu marooqsaday awooddii dastuurka iyo hay'adihii dowladda oo isku milmay (PDRC Talk, Feb. 2025). Waxa uu intaas ku daray in haddii qofka xukunka haya uu sharciga gacanta ugu jiro, ay arrintaasi horseedayso burbur iyo dhaqangalka sharciga keynta (The law of jungle). Arrintaasi waa tan maanta ka jirta dalka Soomaaliya ee keentay saldhigasho la'aanta siyaasadda Soomaaliya.

Waxaa horraantii bishaan (5/10/2025) magaalada Nayroobi is-afagrad ku dhexmaray Somaliland iyo Puntland, kaas oo nuxurkiisu ku saabsanaa iskaashiga amniga, ganacsiga, nabadayenta Ceerigaabo iyo dhaleecaynta siyaasadaynta maamulka hawada ee Soomaaliya.Waxa ay ahayd markii ugu horeysa ee uu dhacay kulan ay wada yeesheen Somaliland iyo Puntland oo si muuqata is-af-garad garay. Siyaasiyiinta mucaaradka ah iyo xisbiyada mucaaradka ee Puntland ayaa ka hor yimi heshiiska, iyagoo ku tilmaamay mid wax u dhimaya midnimada Soomaaliya. Arrinaas waxa xoojinaya Guddoomiye-ku-xigeenka baarlamaanka Puntland oo sheegay in ay Somaliland tahay dowlad baasaboor iyo calan leh. Weraysi uu BBC-da siiyey wasiirka arimaha gudaha ee Puntland, Cabdi Faarax Juxa oo ku saabsanaa heshiiskii Somaliland iyo Puntland, ayaa ka gaabsaday inuu ka jawaabo su'aal saddex jeer lagu soo celiyey oo ku saabsanayd, maamulka Waqooyi-Bari, halka wasiirka gaashaandhiga ee Somaliland uu ku dhiiraday in xuduudaha Somaliland ay yihiin xuduudihii gumaysigu asteeyay, iyo in aysan Puntland iyo Somaliland ogolayn maamulka artifishalka ee Dowlada Federalku samaysay (sida uu hadalka u yiri). Bareerka Somaliland ee sheegashada xuduudihii gumaysiga iyo sacabtunka Puntland ee ah inay Somaliland ay tahay dowlad calan leh ayaa keentay su'aalaha uga badan ee ka dhashay is-afgradka dhexmaray Somaliland iyo Puntland. Dooda ku saabsan xaduudaha Somaliland, ma tahay mid ay Puntland aqbali karto, xaggee yihiin xuduudaha ay Somaliland ku doodayso? Hadal hayn horey u jirtay oo ku saabsanyd in Somaliland iyo Puntland uu ka dhexeeyo is-fahan ayaa iyana noqotay mid doboolka laga rogay. Arrinta aadka loo hadal hayo, waa fulinta is-afgradka, gaar-ahaan ganacsiga iyo isku-socodka, iyada oo uu maamulka Waqooyi Bari maamulo wadada halbowlaha u ah isku socodka Somaliland iyo Puntland, oo aan siyaasad ahaan ogolayn isku-furanka ganacsiga iyo isku socodka. Dhinaca kale, in badan ayey Puntland ku eedaysay Somaliland in ay la shaqayso argagixisada. Haddaba su'aasha imanaysa ayaa ah, ma eedeynta Puntland baan jirin, mise Somaliland baa ka baxday la shaqayntii argagixisada. Qoraal ay qortay Emirates Policy Center 02/09/2025, oo cinwaan looga dhigay: Waqooyi Bari: Ma Albaabkii Hannaanka Federaalkaa, Mise waa Talaabo uga Daraysa Cakirnaanta jirta. Gunaanudkii qoraalka waxa lagu sheegay in dhismaha Waqooyi Bari, ay ka dhalatay isku soo dhowaansho u dhexeeya Puntland iyo Somaliland, kaas oo calaamadihiisu muuqdeen dhowrkii bilood ee u dambeyey, kaas oo sabab u noqon kara xalinta khilaafaadka ka dhexeeya iyo isku furfurnaanta labada dhinac, iyo weliba is-fahanka aragtida mustaqbalka. Marka la tixraaco qoraalkan, ma la oran karaa, is-afgradka Somaliland iyo Puntland waxa uu ahaa mid horey looga soo shaqeeyey oo ay gacan kale ku jirto.

Dad badan oo arrintan ka hadlay, ayaa walaac ka muujiyey in ay arrintaasi wax u dhimayso midnimada Soomaaliya, taas oo laga soo dheegtay qoraalka is-af-garada oo sheegay in ay Puntland soo dhoweysay xaqa ay Somaliland u leedahay aayo ka tashigeeda, arrintaas oo loo fahmay taageerida gooni isu-taaga Somaliland. Taas waxaa sii xoojinaya hadaladii ay sheegeen qaar ka mid ah mas'uuliinta Puntland, oo muujinayey taageero xoogan oo ku saabsan aragtida siyaasadeed ee Somaliland. Raadinta midimada Soomaaliya waa mid soo baxday markii geyiga Soomaaliya uu gumeysigu qaybsaday. Waxa la timlaamaa, in Sayid Maxamed uu ahaa horseedkii midnimada Soomaaliya. Dhalashadii ururkii SYL, ayey mar kale la curatay aragtida Soomaali weyn, iyadoo ururku uu xafiisyo ka furtay dhamman qaybihii gumaysigu u qaybiyey Soomaaliya. Labadii jamhuuriyadood ee ugu horeeyey ee Soomaaliya, waxaa saldhig u ahaa siyaasadda arrimaha dibada arrinta Soomaaliweyn. Qoraal uu qoray machadka ISS (28/07/2025) waxa cinwaan looga dhigay "Midnimo la'aanta Soomaaliya waa Hubka ugu Weyn ee Al-Shabaab". Taas oo lagu faaleeyey in mar kasta oo uu khilaafka siyaasaddu kordho ay kor u kacayso awoodda Al-Shabaab. Sidoo kale, mucaaradka ayaa Dowlada Federaalka ku eedeeyey in aysan muhiimad siinayn difaaca dalka, ee ay dowladdu culayska saartay hindisaha doorashada. Taas waa ka marag-kacaya, wasiirka dicaafa Soomaaliya, oo u goodinaya dad mudaharaad abaabulaya.

## GUNAANADKA

Waxa muuqata in ay Soomaaliya ka taagantahay xiisad siyaasadeed oo kacsan, taas oo ay sababta ugu weyn tahay is-mari-waaga ka taagan hanaanka doorayashada, dastuurka iyo is-fahan la'aanta u dhaxaysa Dowlada Federaalka ah iyo qaar ka mid ah maamul-goboleedyada. Xalka inta badan lagu talinayo waa helitaanka hanaan doorasho oo laysla wada-ogol yahay, kana wanaagsan hanaankii hore. Arrinta maanta taagan, waa mid horey loo soo maray, hase yeesheen aan wax cashar ah laga baran. Shalay waxa ay ahayd "Shidanaaba Shidan", maanta waa "Dareemaaba danqada". Waxyaabaha ka qayb qaata deganaanta siyaasadda Soomaaliya, waxa ka mid ah is-bedelka hogaanka siyaasadda oo ku dhaca waqtigii loo asteeyay. Maanta waxa muuqata in madaxdii dowlad-goboleedyadu ay xireen albaabkii doorashada. Taas oo keenaysa cakirnaanta siyaasada Soomaaliya iyo qanaanta siyaasiyiinta ooman.

In kasta oo ay jiraan wax la qabtay, haddana weli shacabka Soomaaliyeed waxa uu u baahanyahay samatabixin. Siyaasiyiinta ku hardamaya hogaanka, si dhab ah uguma muuqdaan dhibaatada haysata shacabka. Maahmaah baa ahayd: "Labada dhuugga isku haysta, hooyadood waa gacantaas" Taas oo macne ahaan ah, labo qof oo dhar isku haysta, oo aysan hooyadood aysan dhar haysan. Taas waxa ka dhigan siyaasiyiinta xukunka isku haysta oo uu shacabkoodii dhibaato la ildaran yahay. Mise xaaladdu waxa ay maraysaa meeshii uu Qaasim ka yiri:

***"Dembi Kuma Hadlaayee ma Arag Dowladaan Rabaye"***

Hab-dhaqanka siyaasiga Soomaaliyeed, ee ah "Iri oo hayga daba oran, arkay oo anaa iska leh" ayaa keenay in awooddu ay sharciga ka adkaato oo aragtida hogaamiya keliya lagu socdo. Xaaladu waxa ay noqotay in hogaamiyuhu qaado heestii :"Gorayada geel baa la moodaa", oo ay siyaasiyiinta garbihiisa joogtana ugu daba jiibiyaan:" Waa runtaayoo waa la moodaa" ama sidii Museveni "Yes Sevo". Sheekooyinka Gambool, waa ka mid ah, in maalin uu Sayidku isgu yeeray Daraawiishtii, ka dibna uu ku yiri, geedkani (geed qoyan) sow ma qalalna? Dhammaan Daraawiishtii goobta joogtay waxa ay yiraahdeen: " Sayidii geedku waa qalalanyahay", marka laga reebo Gambool. Ka dibna Sayidka ayaa weydiiyey Gambool sababta uu u aamusay. Gambool waxa uu ku jawaabay:" Sayadii, haddii adiga lagaa cabsanayo, geedku wuu qalalanyahay, haddii Alle laga cabsanayana geedku wuu qoyanyahay". Miyaan Gambool oo kala laga helayn mas'uuliyiinta Soomaaliya ee hogaankooda ku raaca wax kasa oo uu go'aamiyo hogaamiyuhu.

**W/Q:** Cabdiraxmaan Shiikhdoon



**Xigashada Sawirka**: Villa Somalia



















**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA MARAG